Safarkii badmaaxa

C/raxmaan cali maxamed
(Rafiiqi)



Buuggaan in uu kusoo gaaro waxaa sabab u ahaa Isbitaalka Caalamiga ah ee DARUSIHHA INTERNATIONAL HOSPITAL.

Xuquuq dhawr

Xuquuqda buugaan way dhawrsantahay waxayna u dhawrsantahay qoraa C/raxmaan Cali Sh.maxamed (Rafiiqi)

waxaa ka mamnuuc ah dhammaan waxyaabaha lidka ku ah ujeedada qoraaga. Lama daabacan karo iyadoo aana fasax laga haysan qoraaga buuggaan.

haddii ay noqoto in aad wax kala baxdaa waa in aad

Xustid magaca buugga iyo magaca qoraaga. Intaas wixii ka badan waa gaf, loo gafay qof qoraal waqti galiyay oo ku daalay.

Mahadnaq

Waxaa mahad iyo Ammaan leh Allaha Ii suurta galiyay in aan soo saaro buuggaan Qisada ah ee cajiibka ah. Nabad iyo naxariis korkiisa ha ahaato nabiyullaahi maxamed oo uu Ilaahey (sw) u doortay in uu adduunkaan hoggaamiyo nooguna soo dhiibay diinta hanuunka. Waxaa aan u mahadcelinayaa cid kasta oo garab ka gaystay soo bixista buuggaan cuddoon.

Waxaan u mahadcelinayaa dadkii ka qayb qaatay soo bixista buuggaan sharfan waxaana leeyahay beerka idinka ogsooni.

Afeef

Waxaan ka afeefanayaa qaladaadka laga yaabo in ay qoraalkayga ku jiraan waxaana leeyahay kas maaha ee waa kama ee ka qaybqaado dib u sixista qoraalkaan, soo bixiddiisa labaad. Intaa uun ku kaalmeey buuggaan.

Waxaan ka afeefanayaa sida xun ee loo fikiri karo marka buuggaan la akhriyo, haba ugu wacnaato in lagu fikiro ma xalaalbaa mase waaxaaraan lacagta

laga qaato maraakiibta lasoo afduubtay ? Aniga waa xalaal ma dhihin waa xaaraanna ma dhihin.

Hibayn

Buuggaan waxaa aaan u hibeeyay walaalkeey Cabdullaahi Cali Maxamed. Oo raadinta qisadaan jeheeye u ahaa.

Hordhac

Goor aan aad u sii fogayn Soomaaliya waxaa kasoo
ifbaxday rag dhalinyaro u badnaa oo hubaysnaa oo intay baddda galaan maraakiibta soo afduuban jiray,
raggaasi waxaa ay ku caanbaxeen markii dambe magac adduunka uu si gaar ah meel ugu qortay oo cajaa'ibtiisa watay. Waxaa magacooda bartay carruurti caddaanka haa oo lagu cabsiin jiray, buugaag badan ayaa laga qoray, maqaallada laga qorayna waaba xad dhaafeen.

Hawsha ay qaban jireen ma ahayn mid sahlan oo waligeedba wax sahlan sidaa uma saamayn bataan, waxaa ay la dagaallami jireen ciidamo maraakiib ka waawayn saaran.Haddaba nimankaasi mid ka mid ah

ayaa waxaa uu iiga faallooday wixii uu kala kulmay intii uu arrintaasi ku jira. magaciisa iyo deegaanka uu ku noolyahayba waxaa waajib iiga dhigay in aanan sheegin waana ka ogolaaday, sidaa darteed magac iyo deegaan aan qeexnayn ayaan isticmaalay.

Waxaanse kuu sheegayaa in dhacdadaan iyo dhaqamada ka muuqdaba ay yihiin kuwii rasmiga ahaa ee raggaas la magaca baxay, ama loo bixiyay burcad badeed.
Dhawr mar oo uu halis la kulmay ayuu inooga sheeekayn doonaa sidoo kale waxaa uu farta ku fiiqayaa dhibka ay leedahay go'aanka degdegga ah ee la iska qaato uun.

Qisadaan soo socota waa mid cajaa'ibteeda leh waxaana iiga waramayo ninkii ay ku dhacday oo la yiraahdo Faarax daahir xasan oo ku magacdheer " Qadhooyo". Qadhooyo waa raggii hore ee badda mari jiray sanad kastana badda ku safri jiray, wuxuu yaqaanaa xilliyada badda la maro oo lagu safro ama laga shaqaysto. Waa badmareen la qabsaday xaaladaha badda iyo cusbadeeda badan, waa nin aqoon u leh xidigaha ay badleeydu xisaabsadaan. Xidigahaasi marka ay galaan ama xiligii ay soo bixi jireen la gaaro waxaa dhacaya wixii ay sheegeen. Anigaan rafiiqiya ee qoray qoraalkaan waxaan la kulmay mid aad ii cajabisay, taasi aan kaaga waramo sidey u dhacday arrintu, ee sii wad akhriska.

Maalin maalmaha ka mid ah anigoo safar ah ayaa waxaa ila jabay gaari aan saarnaa oo aan doonayay in aan magaalo markaa ii dhaweed ku gaaro, gaarigii cillad ayaa ku timid oo wuxuu ku jabay ama ku halaabay meel cidlo ah oo aanay qofna joogin, dad iyo xoolo iska daaye xitaa cayayaankii yar yaraa kii carari karay wuu ka cararay, waxay ahayd meel abaar ah oo xitaa geed weyn oo la harsado aan lahayn, waxaad moodeysay meel dhiigga muslimiinta lagu daadin jiray oo kulaylka iyo hanfiga ayaa dadka indhaha ka gubayay, waxa ay u ekayd meel dab weyn ka shidan yahay oo holonka dabka awgiis kulayl is qabsaday.

Dadkii intoodii badnayd waa ay iska seexdeen oo hurdo ayay damceen in ay isku illowsiiyaan kulaylka dhacaya. Dadkii waa

ay kala qaybsameen, qaar waxay hoosgaleen gaarigii aan wadanay oo waxa ay islahaayeen kulaylka dhalcada gaariga ka hoosgala. Kuwa kalena gaarigii ayay kor fuuleen oo intay walanbo ka duldhisteen birihii gaariga ayay isku ciriiriyeen. Waxa sidaa u qaybsamaya waa kirayste yaashii, wadihii gaariga iyo caawiyaashiisiina wax ay ku hawlanaayeen sidii ay gaarigaan magaalada ku gaarsiin lahaayeen, Rakaabkii gaariga saarnaa oo aan ku jiray.

Xaaladdaas wax lagu sugnaadaba meeshii waa lagu jactaday qofkastana meeshii uu joogay waa ay celin weysay oo wuu dhibsaday, sidaas darteed qof kasta wax uu jeclaystay in meeshaan meel ka roon uu raadsado.

Inkastoo ay qorraxdu qabowdey kulaylkii xaddhaafka ahaana ilaahey naga yareeyay hadana marba marka ka dambeysa waa la sii tabar dhigaayay oo qofkasta wuxuu dhibsaday joogista meeshaan, qof waliba wuxuu ku tashanaayay in uu isla habeenkaan soo galaayay oo galabtaas ka dambeeyay sidaa darteed wax sahay ah lama wato, qofkii lacag haystay wuxuu is lahaa magaalo ayaa la tagi doonaaye waxba ha isku daalin waxani, qofka ugu fiican ayaa in yar oo timir ah watay, anigu nin wadadaan horay ugu safray ayaan ahaaye waxa aan watay kilo timir ah iyo labo caag oo biyo ah oo aan kasoo iibsadey tuuladii ugu dambeysay oo aan soo marnay.

Goobtaas oo kale meel lagu nagaan karo ma ahayne waxa aan go'aansadey in aan iskaga cararo meesha, inkastoo dad

badan ay meesha joogeen, kuma nagaa karin oo anigu waxa aan ahaa nin Ammin dheer miyiga ku noolaa, waxaana go'aansadey inaan Cagta boorka daro oo aan meesha ka caga cageeyo.

Saacado yar ka dib goor ay sagaal saac oo galabnimo tahay ayaa waxaa nasoo maray laba nin oo socda, ka yimid magaaladii aan u soconay miyigeeda, si gaar ah ayaan u waraystay wax ayna iiga war bixiyeen sida ay wax u jiraan iyo iyo dadka inoogu dhaw inta ay inoo jiraan, waxay iisheegeen in niman kalluumeysato ah ay daggan yihiin meel haddii aan dheereeyo aan u soconayo muddo saddexsaac ah.

Mar Allaale markii ay hadalkaas iyiraahdeen ayaan gooraysada fiiriyay mise waa sagaalkii saac oo ay raacday shan iyo

toban daqiiqo (3:15 p m) inta aan boorsadeydii oo nooca dhabarka lagu xirto ahayd isku garwaaxiyay mar qura sidii gantaal la riday u booday, dadkii qaar ka mid ah ayaa isku dayay in ay i celiyaan balse waan ka diiday, waxaana u sheegay in meeshaani aan waligeey ku lugayn jiray.

Nin meel u caddahay meeli ka madoobe waxaan si deg deg ah uga dhaqaaqay goobtii gaarigu ku hallaysnaay, markii aan dhawr tallaabood oo dhulduub ah horay u qaaday ayaa waxaa soo dhaqaaqday oo iyana boorsadeedii soo jiidatay gabar ka mid ahayd rakaabkii gaariga ila saarnaa !! Oo ilaa iyo safar billowgii aan si wanaagsan usoo sheekaysanaynay. Yaab iyo amakaag waan sugay waxaana isku dayay in aan u sharraxo meesha aan u socdo in aanay ahayn meel dhaw ama xitaa meel haddii la

tago aan amaankeeda ku sugi karaayo, se waxaasi waa ay iska dhaga tirtay.

Waxaan dareemay in aan mashaqo kale lugaha la galay waqtiguna uu igu socdo, si aan xal u helo ayaan u soo laabtay, waxaan u tagay darawalkii waxaana uga waramay sida aan wax u rabo, wuxuuse igu yiri" Anigu wax xal ah ma haayo".

Waxaan go'aansadey in aan gabadhaan ka dhuunto kadibna darawalkii ayaan la hadlay oo ku iri iga yara mashquuli oo dadka oo dhan meel ku jeheey, sidii ayuu oo waxaa uu yiri dhammaanteen na kexeeya waxaan aadeynaa cidaha baadiyaha oo meeshaan daganaan jiraye, haddii aan weynana waxaan helaynaa ateeno aan ku hadalno e. Sidii ayaa la isku

raacay oo qofwalba gaarigii ayuu boorsadiisii ka doontay, gabadhiina dadkaas ayay ka mid noqotay oo gaarigii ayay gashay, anna fursaddaas ayaan ka faa'iideystay oo cagta ayaan boorka daray mar kale.

Waan ogahay oo waan ka dharagsanahay haddii aan aad u fogaado imasoo dabakici karto oo meesha waa laga baqayay, anigase waxaas ma qorin oo duur iyo banaanba waa iskugu kay mid tobankii saac oo waxyar dhiman ayaan mar kale sii anba qaadey safarkaygii lugta ahaa, waxaan socdaba waxay noqotay habeenkii ayaa igu galay waana mugdi aan isha farta lala helin.

Alla maxaan qof nasiib xun tahay ayaan niyadda iska iri, se kuma sii celcelin oo waxaan islahaa sidaan in ay khayr tahay

ayaa laga yaabaa, meesha aan xiligaas maraayo nimankii waa ay ii carrabbaabeen oo waxay igu yiraahdeen meesha aan kuu sheegayno waxaa ka sokeeya meelo dhagax ah oo qodaxleh, jeerin iyo geed qodaxeed kale ayaa ka buuxa qofkaan dhul yaqaan ahayna wuu ku dhibaatoonayaa.

Balse hadalkaas dhag uma dhigin markaas, se markii ay dhawr qodax inta kobta iiga soo dhexbaxday ay igu tagtay ayuu igusoo dhacay. Meel aan ku hakado oo aan waabariga ku sugto ma joogo oo waxaan ka baqayaa inta seexdo inay bahaladu fursad igu helaan, oo dhulkaas lama dagaanka noqdey bahaladu waa ay ku badan yihiin, intii aan soo socday waxaan soo dilay dhawr mas oo qaarkood ay aad u waaweynaayeen.

Habeenkii ayaa igusii weynaadey toosh yar oo moobeelka (mobile) iiga shidnaana dab la'aan ayuu sheegay wax aan ku dabeystana ma hayo, waxaan ka baqay in uu mugdiga iyo aniga inoo kala dhexbaxo. Muddo gibina markaan socday Gooraysada fiiriyay mise waaba taddobadii habeenimo (halsaac) oo waxyar la' waxaan is iri nimanku sida ay sheegayeen ma ahan bahashu waadna gaadan tahay ee isbarqabo, maxaanse in barqabtaa wabaa ku jiraa shabaqiye ! Waxaan ka war helay tooshkii oo mar qura damay haddii aan fiiriyay wuxuu u damay dab la'aan.

Nasiib xumo kasii nasiib xumo. Hadda iyo koow mugdi iyo qodax rafaad jawaan ku jira ayaan cantoobo ka qaatay, bal maxaa isoo waday ? Xumaa waxaadan ka fikirin, inyar markaan socdey ayaan kala garan

waayay meel aan u socdo iyo meel aan ka socdeyba, jahadii ayaaba iga dhuntay waaba wareeray, xitaa dhinaca aan u jeedo ayaan aqoon waayay, haddii ay bishu soo bixi lahayd waxaan garan lahaa dhanka bari, hadase meel aan u jeedo xitaa waan aqoon waayay.

Meel ayaan iska fariistay oo waxaan is iri bal inyar naso, daqiiqado gaaban ka dib waxaa korkayga maray wax ilaa hadda aan fahmi la'ahay waxay ahaayeen, anigii dhammaa waxaan ku sigtay in aan barbar u dhaco hugufka igu dhacay dartiis!! Qof duulaaya wax duulaaya oo qiyaartii aan u maleeyay in uu la'ekaay qof weyn oo baalal dhaadheer lagu xiray, inkastoo aan arag mukusha saxda ah hadana xiinka iyo xadiga hugufku waxaan ku qiyaasay inuu la'ekaa qof weyn oo baalal leh.

Cabsi bahal ayaa isoo gashay oo waxaan is iri haadkaasi waxa uu doonayay in uu horay kuu dafo, se meeshii uu kaa filayay ayaad ka hoosmartay oo markaan ilaaheey kaaga badbaadiyay, nafta ayaan orod ku sabarsiiyay alaabtaydii intaan qaatay ayaan dhinicii uu wajigaygu xigay iskaga orday, Daqiiqado badan markaan sii ordayay intaasna aan geedaha qodaxda leh sidii dhulladii u dul maraayay ayaan mar qura qodaxdii iyo caadiiba waayay, waan yaabay marna ilaahbaan u mahadceliyay, waxaan ku farxay dhulladaan bannaan oo aan qodaxda lahayn, sababtoo ah lugayga lagama helayn meel aanay qodax mudin, sababtoo ah, geed qodaxeedka waxaan u dhex taraarayay sidii bacaadkii dhullada.

Orodkii ayaan sii laba jibbaaray inyar ka dibna waxaan dareemay guuxii badda, markaan badda arkay ayay ig fuqdey naxdin weyn, oo waxaan is iri haddii uu bahal kusoo weeraro badda ayaad ka gali kartaa, sidii ayaana biyaha afkooda u istaagay, markaas ayaan dabaysha cabbiray, waxaana aadey dhinicii ay dabeyshu ka socotay. Xoogaa markaan socdey ayaan arkay doomo xeebta yaala waxaan xaqiiqsadey in nimankii la ii sheegayay aan soo gaaray.

Golihii iigu sokeeyay ayaan abbaaray oo nabdeystay si wanaagsan ayayna iisoo dhaweeyeen habeenkaasna wax ay ii ahayd habeen wanaagsan marka laga reebo intii ka horaysay nimankaas kalluumaysta yaasha ah, waxa aan ka wadaa intii aan jidka kusoo jiray xaaladdaydu ma fiicnayn oo goor

jahawareer ahbaan ku jiray, alle mahaddiiye cunto fiican oo aan aad u xiisaynayay ayaan si fiican u cunay meel aad u dugsanna waan seexday, faarax nin la yiraahdo oo raggaa ka mid ahaayna waxaa uu isiiyay go' aad u dugaal badnaa oo aan la yaabay culays kiisa, waxaan ku qayaasay culayska go'aas in uu gaarayay ugu yaraan shan kiilo. Siduu iila wanaagsanaa darteed habeenkaas waxaan go'aansaday in magaalada ugu horaysa ee aan tago aan ka iibsado go'noocaas ah mase dhicin.

Wax gogol la yiraahdo ma jirto waxaa la barraxanayaa ciidda bacaadka ah, se boqol gogloodna ka macaan haddii aad la qabsato ayaan u seexday, hurdo macaan oo aan garan waayay in aan daqiiqad hurdaayay iyo in aan saacado hurdaayay,

Ayaa waxaa mar qur ah hurdada iga kiciyay dhawaaqa matoorada badda lagu dhex mushaaxo, ama looga dhex shaqaysto, oo xilligii ay badda gali lahaayeen la joogay, aad ayaan u xiisaynayaye si degdeg ah ayaan go'ii iskaga gadiyay, si degdeg ah ayaana xeebta u aaday, intaan badda ku weesaystay ayaan isla xeebta ku tukaday, waxaan ka qayb galay jiidistii sixiimadaha badda lagu galinayay, yacnii sixiimadda marka subaxdii badda lagasoo bixiyo waa laga soo fogeeyaa si aanay u qaadin baddu oo aayan u jajabin, subaxdii marka la gaarana xagga badda ayaa loosoo jiidaa, anigu qaabkaan sanaddo ka hor ayaa igu dambeysay oo aad ayaan u xiisaynayay. Waxaa aan aad u jeclahay marka doomaha ay badda galaan ee hirarka laga dhex dusayo, ama hirka gabigiisba loo gambinayo.

Wasidii aan filaayay oo doomihii xeebta ayaa lagu diyaariyay, waxana diyaar loo noqday in hirarka badda la tiriyo oo laga dhex raadiyo wax loo yaqaano Tirin. Mid mid ayay doomihii badda u galeen, waxa badda loo galayo waa libaax badeed, waana shaqo xagaa, baddu waa bad xagaa oo buunbuun ah, qabowga badda waxaad mooddaa in in uu hoos baraf uga jiro.

Doomihii markii ay badda galeen ayaan soo raacay bannaan joogyadii doomaha badda ku baaryay ee banaanka u socda. Sidii aan usoo soconay ayaan kaamamkii dib ugu soo laabanay kaamamkii, halkii ayaana iska joognay ilaa la gaaray xiligii ay doomihii soo bixi lahaayeen.
Cunadii la cuni lahaa ayaa la diyaariyay, balse doomihii wali sooma bixin, ciyaar

ayaan bilaabanay markii aan ciyaartii ku daalnay ayaan xeebta aadnay, isla markaasna doontii ugu horaysay ayaa soo baxday, waxa ay keentay dhawr xabbo oo libaax ah.

Dhamman doomihii waa ay yimaadeen mid kastana wxaa ay keentay libaaxyo badan, Allaa mahadlehe, maalintaasi waxaa ay ahayd maalin wanaagsan, kalluumaysatadii aan halkaa isku aragnayna aad ayay u faraxsanaayeen.

Waan qadaynay qof kastana waxaa uu raadsaday meeshii uu seexan lahaa oo uu kulaylka qorraxda ka gali lahaa.
Anigu marti ayaan ahaa waxaana la ii tilmaamay meeshii ugu habboonayd ee la

seexan jiray, waa qar weyn oo bari usii jeeda hoostiis.

Qarkaas hoostiisa waxaa ay leedahay ciid yara qabow, waxaa aad jeclaysanaysa in aad iska seexato mar kasta. Meeshii ayaan seexday isla markiiba hurdo degdeg ah ayaa igasoo dhacday oo aad ayaan u macaansaday. Xoogaa markii aan hurdaayay, ayaa waxa aan kusoo kacay, shanqar qofeed, yacnii buste weyn oo dhulka si culays leh ugu dhacay, waan dareemay in qof ii yimid mase fiirin qofka uu yahay.

Inta aan go'ii fududaa ee aan hugnaa iska qaaday ayaan fiiriyay mase waaba faarax, waa ninkii xalay go'a dugaalka badnaa isiiyay, waxa uu dhulka ku dhuftayna waa go'iisii weynaa ee uu xalay isiiyay.

Waan salaamaysi wanaagsan ayuu salaanta iiga qaaday, kadibna waraysi dheer ayaa ina dhexmaray waraysigaas oo waxa uu iiga sheekeeyay qiso aad iiga yaabisay oo igu qasabtay in aan buuggaan ku qoro, Waxba yaana hadalka idinku dheerayne, idinkuba dheereeyaybee, qisadu waxaa ay u dhacday sidatan soo socota,

Faarax waxaa aan weydiiyay wixii ugu yaabka badnaa intii uu badda ka shaqaynayay, waxaa uuna iigu jawaabay, rafiiqiyoow haddii aan kaaga faaloodo dhibka igasoo maray badda iyo damac mar iqaaday dhibka uu I gaarsiiyay, waxaa kugu yaraanaya waqtiga aad wax ku dhagaysanaysid.

Waxa aan ku iri haka yaabin qiso uu qof ii qisoodo kama daalo oo cibrada ayaan ka gurtaa, ee ii billow bahasha,

Waa yahay inta uu i yiri ayuu dhagax ii dhawaa fadhiga ku quruxsaday. Waxaa uuna yiri dhagaha furo. Adigan akhristoow indhaha furo.

Faarax waxaa uu qisadiisa ku billaabay waxa aan ahaa labaatan iyo shan jir xoogiisu dhan yahay waxaa aan ka shaqayn jiray badda balse maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxaa ii yimid saddex nin oo dhallin yaro ahaa, waxaa ay iisoo ban dhigeen qorshe markaas ka hor aana ku baraarugsanayn balse aniga ay ii wanaagsnayd in aan markaas diido balse wixii kuu qoran waa ay ku qabsanayaan wiilasshu waxaa ay iisoo bandhigeen in aan ka qayb galo barnaamij markaa lacag badan laga samaynayay xalal iyo xaraan waxa ay hayd ma sheegi karo e, barnaamijkas oo ahaa in inta hub la qaato maraakiib badda

maraysa lasoo afduubto, bernaamijkii sidii ay iigu celelinayeen ayay iga dhaadhiiyen, barnaamijkas oo ahaa in mar aan badda u shaqa tago aniga oo qoraygaygii wata qoraygayga, maadaama aan ahaa nin aad ugu fiican wadista doomaha waxaa ay iisoo ban dhigeen in aan doonta anigu wado dagaalkana aan qayb ka noqdo oo marka markabka la weerarayo aan ka qayb qaato sidii markabkaas loo qaban lahaa, haddii markabka lasoo qabtana ay ii ogol yihiin in aanqaato laba saami, yacnii laba nin qaybtood.

Waan aqbalay isla markiibana waxaa ay iigeeyeen maalgaliyihii meel wanaagsan oo gurigiisa ka mid ah ayuu I fariisiyay waana i waraystay, waxaa uuna aad ugu riyaaqay xirfadaha aan sheegtay, waxaa uu ii raaciyay in badda iyo maraakiibta xeebta

ku xiran la igusoo baroobayn doono, waa yahay ayaan ku iri , isla markiiba waxaa uu amar siiyay qaar kamid ah raggii ag safnaa waxaa uuna ku yiri: ‘‘Aaway hebel iyo hebel’’ si deg deg ah ayay laba nin uga soo istaageen oo yiraahdeen ‘‘maxaa aan kaa caawinaa masuul’’ waxaa uu yiri waxaa aan doonayaa in ninkaan aad waddaan oo aad iga soo tijaabisaan inta aad hebel u gaysaan oo markabka baroosinka loo qaado kadibna hala wado markabka kadibna ninkaan doon dheeraysa oo ugu yaraan lixdan kabbaalle saaran yahay u dhiiba, oo iisoo duuba sida uu ugu xalladeeyo, oo uu ugu caashaqo, ragga markabka markabka saaranna kabtanka ha ku amraan in uu iska ilaaliyo doontaas, baaruudda holacdana ha lagusoo tuuro si aan u ogaado qaabka uu uga weecdo.

Waxaa laga yaabaa in markii la shaqa tago ee markab la arko oo weerarka la billaabo, uu billaabo in uu iska caabbin xoog badan la yimaado oo uu baaruud iyo qaraxyo uu soo tuuro sida uu ugu gambiyo iiso duuba. Raggii waxaa ay ku jawaabeen waayahay masuul ee qaadka meel noosaar, isagiina waxaa uu yiri, waa yahay sidii ayaa gaarigii la igusoo saaray xeebtii oo toban iyo siddeed kilo mitir inoo jirtay ayaynu nimid. Raggiina sidii sidii lasoo amray ayay sameeyeen, anigana taasi xanuunba iguma hayn oo waaba shaqadeydii.

Tijaabadii ayaa igu bilaabatay oo intii aan gaariga ka dagaayay ayay inta qolo hoos ka direen ayay ku amreen in ay matoorka dabka ka xiraan sidii ayaana matoorkii dabka looga xiray, markii aan xeebta imid, ayay igu yiraahdeen kici matoorka,

matoorka waxaa lagu kicinayaa xarig la jiidayo oo markaas ayuu kacayaa, balse maba kacayo matoorku, kubayrkii ayaan ka qaaday, oo waxaa aan fiirfiiriyay fiilooyinka dabka, maadaama aan ahaa nin muddo sanaddo ah ku shaqaynayay oo aad u fahmaya cillad kasta oo ku timaadda.

Isla markiiba waan cillad bixiyay waana kiciyay, mar qura ayay ii sacbiyeen oo igu yiraahdeen waad ka baxsatay tijaabadaan, waadna ku baastay ee qaybta badda ayaa kuu hartay, waxaasi waa hawshayda ee horay ugu socda ayaan ku iri, iyagiina waa ay yaabeen, kalsoonida iyo dhiirranaantayda ayay la yaabeen, wax kasta oo ay caqabad iiga dhigaanba si fudud ayaa aan uga dhexbaxaa. Waxaa aan ku noqday mucjiso caadi ah waa ay rumaysan waayeen farsamadayda.

Waxaa la fuulay doontii oo badda ayaa lagu baaryay doontii, waxaana ku raacnay afar rag ah, waa saddex uu soo wakiishay maalgaliyihii iyo aniga oo la i imtixaanayay, waxaa amar la igu siiyay in sida aan doonta usii wado aan markab la ii tilmaayay dheegga uga qabto sidii ayaana yeelay.
Jaranjaro xarig alwaax lagu taxay ka samaysan ayay soo daadiyeen, waala fuulay balse aniga doonta la joogisteeda weeye shaqadayda, marna gacanka matoorka gacantayda kama bixin, waxyar markii ay iga maqnaayeen ayaa markabkii la kiciyay oo meesha ugu saraysa uuro kasii daayay.

Waxaa aan dareemay, markabku in uu dhaqaaqay oo uu baroosinka qaatay, matoorkii oo markii horeba ii kacsanaa,

hase yeeshee aanu gayr iigu jirin ayaan gayr gashada waana ka yara durkay, isla daqiiqadiiba markabkii waxaa uu jambiyada kasoo daayay biyo tira badan oo aan ka baqayba in ay doonta iga buuxiyaan oo ay doontu sidaasi ku dagto.

Waan ka fogaaday balse waxyar ka dib ayaa raggii ila socday iyo kuwo kale waxaa ay soo istaageen sagxadda markabka iyagoo aad u qaylinaya balse ma maqli karaayo codkooda oo waa iga korreeyaan, anna xoogaa ayaan ka fogahay, waxaa aan dareemay in ay doonayaan in ay soo dagaan, balse ay la yihiin qaabkii ay u soo dagi lahaayeen, markabku waa uu socday, hase yeeshee waxaa uu ku socday socod gaaban, oo aad uma xawaaraynayn, waxaa aan ka baqaayay, haddii aan markabka u dhawaado in biyaha uu dhinacyada ka

furay ay doonta iga buuxiyaan, balse nasiib wanaag waxaa igusoo dhacday fikrad, taas oo ahayd in aan markabka u dhawaado maadaama markabka hoostiisa aanu biyaha ku shubi karin oo biyuhu ay goomanka kasoo daadanayaan, oo haddii doonta markabka dhinaca loo saaro biyuhu aanay doonta galay ee ay kasoo dul boodayaan, sidii ayaan yeelay oo doontii ayaan mar qur ah markabka kusoo jembi qabtay biyuhuna korkayga ayay heehaabayeen oo waxaa ay ku dhacayeen meel xoogaa ii jirta.

Markii ay xaqiiqsadeen in aan kaasna ka gudbay ayay billaabeen in ay igusoo tuuraan walxo gadgaduudan oo holcaya ! Dhawaaqoodana dhagaha kaa galayo, waan yaabay waxaana uga shakiyay sidii xabbad run, waxaa aan iska ilaaliyay in ay mid ka mid ah doonta ku dhacdo, oo waxaa aan u diiday in ay helaanba fursad ay xabadda

iigu cabbiraanba, sidii maskii ayaan marba dhinac u jaray doontii, iyagii ayaaba yaabay oo gacanta ii haatiyay iga oo ishaaraya in aan doonta usoo dhaweeyo, mase aaminin oo waxaa saki i galisay hadalkii maalgaliyaha, ee ahaa ninkaas igasoo hubiya, markiiba waxaa lasoo laalaadiyay nin jaranjaradii dheereed ee markabka lagu fuulaayay, nasiib si dag-dhg ah ayaana la igu wargaliyay in aan jaranjarada u qabto ragga, marii aan usoo dhawaaday ayay bool boolashii jaranjarada isku haayay ka mid ah fureen, markaas ayay iisoo dhiibeen jaranjaradii oo kala lulanaysa, doontii ayaan soo hoosdhigay jaranjarada, waxaase ii muuqatay in ay jaranjaradu kala go'irabto oo qaybtii cuslayd ay badda ku dhici rabto,haddii ay badda ku dhacdo waa ka sabar oo cid halkaas ka quusi kartaa ma jirto, waxaa aan go'aansaday in aan jaranjarada

aan markabka iyo doonta iskula qabto kadibna aan gacantayda doonta kusoo saaro qaybtaan go'i rabta, sidii ayaan sameeyay waana ku guulaystay oo intaan jaranjaradii iyo markabkik doonta jembigeeda ku qabtay oo soo istaagay ayaan si fiican doonta u saartay.

Kii loosoo xilsaaray arrintaydaan, aad ayuu ula yaabay qorshahaasi, waxaa uuna kasoo dagay markabkii kadibna si wada jir ah ayayna iigu hambalyeeyeen, waxaa ayna igu yiraahdeen doontaan inoo wad oo xeebta ina geey, waxaa ayna ii raaciyeen walaale waad ka gudubtay dhammaan baaritaanadii iyo hubintii lagu marsiinayay, waan yara farxay waana u niyadda uga mahadceliyay wiilashii bernaamijka igula jiray oo garabka isoo ogaysiiyay.

Raggii waxaa ay waceen maalgaliyihii waxaa ayna ku yiraahdeen ninku waa nin xirfadle ah ee ha iska dayn tijaabo kasta oo aan marsiinayna si cajiib ah ayuu uga gudbay, hadalkaasi qalbiga ayuu ii dajiyay waana iga farxiyay, xeebta ayaan si naxariis darro ah ugasoo sarriibay doontii waxaana doontii usoo tuuray si cajiib ah, taas oo sababtay in doontu ay sidbato oo ay bacaadkii xeebta si wanaagsan ugusoo dul sibxato awoodda uu matoorku biyaha ugasoo tuuray darteed, waxaa ay gaartay meel qalalan oo aan dhibic biyo ah lahayn, xitaa haddii doonta meeshaas la iska dhigo aanay wax biyo ah soo gaarayn, taasina waxaa ay sababtay in dadkii xeebta joogay aan ka helay taageero oo ay si wanaagsan iigu hambalyeeyeen.

Raggii ayaa doontii ka dagay, si la yaab leh ayayna iigu hambalyeeyeen mid walba oo isoo mara waxaa uu igu lahaa ninyahow doomaha meeqa sano ayaad ku dhexjirtay wadistooda, anna waxa aan ugu jawaabayay, waligeeyba waan ku jiray marna kama fogaan, waxaana hubaa in aad wax badan ila yaabi doonto haddii aad xug badan iga ogaato.

Waxaa lagasoo tagay xeebtii, waxaana loo holladay oo la damcay in la aado xagga magaaladii, gaari saaruf ah oo xeebta inoo taallay ayaan ku dhacnay, waana xawaaro sare ayaana goobtii uga dhaqaaqnay, ragga kale hub ayay sitaan oo dhammaantoodba waa ay hubaysan yihiin, aniguse ma hubaysni kaliya waxaa la iigu talagalay in la isoo baroobeeyo oo la iga hubiyo in la igu aamini karo in aan hoggaamiyo safar dagaal

u baxaya oo aan la ogayn meesha uu ku wajahan yahay, waa ii farxad in si buuxda la iiga xaqiijiyay in aan u qalmo shaqada la ii igman doono, maalgaliyaha safarkaanna uu igu aamini doono in aan safarkaan hoggaamiyo.

Gaarigii wax boorka sii kiciyo carrada cammuudda ah ii jiilaalku uu halakeeyay uu lugta ku kala firdhiyaba, wax uu buska gaariga cagahiisa ka duula uu cirka isku shareeraba waxaa aan gaarnay magaaladii aan markii hore kasoo baxnay annaga oo tijaabo doon ah, aniga waa ay ii kala duwan yihiin labadaas marba, markii aan xeebta u socday waxaa i haysay cabsi iyo armaad raggaan hubaysan ku fashilantaa, oo inta ay kugu xanaaqaan beerka xabbad kuu galiyaan, balse garaaddo dheeraad ah ayaan kasoo helay iyagii.

Waxaa lasoo galay deegaan ay dad daganaayeen oo xoolo iyo dumar ka muuqdeen, raggii gaariga saarnaa qaar ka mid ahaa, ayaa wadihii ku yiraahdeen, bal gaariga inoo celi aan inyar ari jiratadaas aan bal soo waraysano e, gaarigii waala celiyay, dhawr nin ayaa dagtay iyaga oo qoryahoodina gacanta ku qabsaday.

Mid iyagii ka mid ah ayaa la hadlay mid kale oo meel ii dhaw joogay, waxaa uuna ku yiri saaxiiboow isoo raac naagahaas halkaa ka muuqda ayaanu kasoo fududaysanaynaa maadaama aan badda muddo dheer ku maqnaan doono oonaana cidna is arkayn, wax kasta oo aan samaynana aanu qof banii aadam ah war inaga hayn. Waan kufsanaynaa kadibna waanu inkiraynaaye

isoo raac!, ayuu ku yiri ninkii uu la hadlaayay,

Anigu inkastoo aanan iyaga ka fiicnayn sidooda oo kalena aan ahaa faajir aan salaadda iyo soonka ama cibaado kaleba isku taxluujin, niyaddaydu waa ay hagaagsanayd, isla markiibana naxariis ayaa i gashay oo waxaan u baqay silica ay mari doonaan gabdhaha yar yar ee dandarrada loo diyaarinayo, iyo cirib xumada ka dhalan doonta.

Wadigii gaariga oo intuu hees dheeraystay ay adag tahay sida uu wax ku maqlo, sidii in uu masrax ka heesayana isaga uu ka cod dheeryahay fanaankii heesta qaadayay, ayaa meel u dhaw fariistay, intaan soo jeediyay ayaan ku iri ninyohow raggaan aad gaariga u celisay waxaa ay doonayaan in ay

wax yeeleeyaan gabdhaha masaakiinta ah ee xoolahaas la jooga, ee ka hortag oo gaariga horay u dhaqaaji, lagama yaabo in ay inaga haraan e, waa ay cabsanayaan waa hubaal e.

Markaas ayuu soo baraarugay oo yiri saaxiiboow ciddayda ayaaba meesha daggan ee waa in aan ka hortagaa arrinkaan ! Isla markiiba gaarigii ayuu marsho galiyay horay ayuuna u xawaareeyay, xoogaa mar uu socday ayuu ayuu yara gaabiyay xawaarihii.

Dhanka kale Raggii oo aanan taladaba ku darsan waxa kan dhacaya ayaa mar qura ku baraarugay gaarigii oo dhaqaaqay kii ugu horreeyay iyo kii ugu dambeeyayna sidaa ayay mar qura usoo wada laabteen ujeedadii ay u socdeenna sidaa ayay uga

laabteen, waan ku farxay arrinkaas waxaana ku guulaystay in aad dhibaato soo socotay afka u dhigtay oo aan saac guuriyay.

Ilaaheey ajar ha iiga qoro inkasta oo ay xaaladayda cibaado galabgalab ahayd. Gaarigii waa dhaqaaqay dadkiina waa ay soo wada raaceen mana jirin qof ka hartay se waxaa ay xaaladu u ekayd mid qayaano ah oo markii ay gaariga soo galeen ayay igu yiraahdeen anagu cidna dhibaato lama rabin se adiga ayaan kugu tijaabinaynay geesinimadaada iyo hal adayggaaga, odayguna waxaa ay u ahayd tijaabadii ugu dambaysay oo lagu marsiinayay.
Ee horay u soco shaqadaadana qabso oo ha isku habsaamin, ayay igu yiraahdeen raggii mar uu gaarigu si daggan u socday, ma hubo in uu hadalkaas run yahay, iyo in uu sheegasho been ah yahay.

Waxaa suurta gal ah in ay iyagu qiil ku raadsanayaan maadaama ay xaaladdu ku adkaatay ceebna faraha la galeen, dambi weynna ay galeen, oo xitaa loo qabsan karo oo meesha ay nafi ku go'i kartay maadaama ragga meesha dagganaa mid ka mid ah uu gaariga waday, haddii arrintaan lasii buunbuuni lahaayna ay halis ka imaan lahayd. Gaarigii xawaarihiisii ayuu ku dhaqaaqay magaaladii aan u soconayna markaa waa ay inoo dhawdahay, oo daqiiqado yar ka dib haddii aanu amar kale dhicin waanu tagaynaa, waxaanu maqalnay dhawaaq qaabdaran oo gaariga kayeeray waanu is fiirfiirinay, waxaan dareenay in gaarigu uu dhinac u qalloocan yahay, garanay in ay lug shiiqisay oo ay shaqo gabtay, waxaase is weydiin leh gaarigu lug kale ma wataa ? Taasi cid haa ku jawaabtay ma jirin oo xitaa gaariga lamasoo hubin

markii lagasoo bixinayay hoygii uu ku xaraysnaa.

Waa lugtii gaariga oo dillaacday iyo meel dhagax ah oo xitaa aan saacad la joogi karin kulayl dartiis, arrinta dhibka lahayd ee aniga i shaki galisay waxay ahayd meesha aan joognay oo ahayd meel aan qad lahayn, qofkii lasoo wacana lama heli karo loogu hal celinayo ha la is fiirfiiriyo ayaa ka dhacday aad ayaana loo baqanayay oo meeshu waxaa ay ahayd meel yara cidlo ah oo deegaankii iyo dadkiiba waan kasoo dhaqaaqnay inkastoo aanay aadna nooga dheerayn oo intii aan soo soconay ay gaabnayd.

Aniga iyo raggii qaar ka mid ahaa waxaan go'aan ku gaarnay in aan meesha ka tagno oo aan meel qad leh raadsano, balse kuwii

kale ayaa iyagana diiday oo yiri waanu is raacaynaa ama waan isla joogaynaa, muran dheer ka dib waxaa la isku af gartay in wadaha gaariga oo cidihiisu ay meesha daganaayeen uu cidda ugu dhaw gaaro oo uu war inaga gaarsiiyo, haddii aynu cunno ka heli lahayn iyo haddii ay qaylo dhaan magaaladii inoogu diri lahaayeenba.

Waa la isku raacay ninkiina waxaa uu isku diyaariyay in uu baxo, oo xagga cidaha uu aado mase dhicin oo waa uu ka cudur daartay waxaa uuna yiri anigu waligeey ciddaan sooma dhexgalin waanse ka dhashay, waagii aan qaadka bartay ayayna i cayriyeen, halkaas ayaana iigu dambeysay ee ina mariya dhammaanteen aan si wada jir ah ugu tagno oo aan marti galin ka codsano e.

Waa la is diyaariyay qof kasta waa uu is tirtiray si uu iskaga dhigo nin wanaagsan oo quman, oo aan cibaadada rabbi Sw marna ka dhexbixin, waan isasoo raacnay, waxaana usoo dhaqaaqnay xaggii ay ciduhu inaga xigeen, waa xilli asar liiq ah oo qorraxdu leebabaynayso, yayaantuna sii kordhayso.

Waan dhaqaaqnay oo xoogaa ayaan soconay balse intii aanan aad u fogaan ayaan meeldhaw waxaan ka aragnay gaari nuuca ay soomaalidu u taqaano Laylacalaawiga ah oo meel dhaw inoosoo socda, ma suurta galin in aan goor hore aragno oo meesha aan joognay ayaa ahayd meel qolob ah oo laba buur dhexdood ah, gaarigu xawaaro dad didis ahna ku socda, waxaa uu nagasoo galay xaggii ay magaaladu inaga xigtay, waan ku qaylinay

si ay garab inoo siiyaan, oo ay wax uun inoogu qabtaan.

Gaarigii waxaa uu ku leexday gaarigii aan wadanay oo aan xoogaa ka hor kasoo tagnay, markii uu gaariga istaagay qofkii ugu horeeyay oo kasoo dagay waxaa uu ahaa nin magaciisa la iigu sheegay Saadaq oo wade ka ahaa gaarigii markii hore maalgaliyaha la iigu geeyay.

Waxaan xaqiiqsaday in gurmad xagga magaalada ka yimid uu yahay gaarigaan, waan soo wada laabanay isla markiiba waxaa gaarigii kasoo dagay duqoow oo ahaa farsamayste aan aqaanay ilaa iyo intii aan badda ka shaqaynayay oo dhan, matoorkii aan wax ka qaban waayayna aan u gayn jiray, isla markiiba gaarigii ayuu aaday lugtii banjartay ayuuna fiiriyay, intuu

soo laabtay ayuu gaarigii kale lug kala dagay, gaarigii ayuu ku xiray aniga intaa ay hawshu socotayba isha ku haayay ayaanu soo gaarnay halkii uu gaarigu yaallay, wada hadal yar ka dib waxaanu raacnay gaarigii waana la dhaqaajiyay isla markiiba ilaa looga dhawaaday magaaladii soo dhaweyn aad u saraysa ayaa inaga hor timid isla markiiba. Oo yaa ina soo dhaweynaya waa maalgaliyihii dhammaa oo gaarigiisii soo qaatay, waxaa la socda gabdho sida qorraxda u dhalaalaya oo indhaha soo jiidanaya, waxa ay ku dhawaaqayeen, shaqatagayaasha soo dhawaada ! Sacab iyo jiib aad u macaan ayayna saarayeen taasoo dhiirigalin aad u weyn igu samaysay xaaddana i kicisay, si dhab ahna ii jeclaysiisay in aan shaqo tago.

Soo dhaweyntii waxaa ay ina dareensiisay in aanu nahay dad lagu hanweyn yahay, aad ayaana u jeclaysanay, anigana si dhab ah ayay iiguubaabisay arrintaasi go'aan buuxa ayaana ku qaatay in shaqatagayo qoraygaygana aan daanta qabsanayo, waxa aan iskugu tagnay bakhaarkii weynaa ee oday cusmaan oo ay hawsheennu ka bilaabnaysay.

Oday cusmaan waa maalgaliyihii safarkeena badda waxaa uu leeyahay qalabka aan ku shaqatagayno, waa ninkii la ii keenay markii koobaad, waa ninka bixiyay amaradii badda la igusoo tijaabinayay, waana ninka koowaad ee markabka lasoo qabto fuulaya xagga lacag qaadashada.

Dhammaanteen waxaan iskugu tagnay qol si fiican loo diyaariyay oo darin aad u quruxbadan, lagu goglay, shaah sokor fuul

ah, qorfo iyo hayl isku miisaamanna lagu daray, ayaa gogosha lagu diyaariyay, nin walba meeshii ku habbooneed ayuu fariistay.

Isla markiiba waxaa inaloo keenay qaad, nin waliba waxaa uu furtay qaadkii loo keenay, sagaarkiina waa la shitay, anigu markaygii horeba qaad cun ba'an ayaan ahaa se sidii aan u billaabay shaqada kalluumaysigaba waa ay iskugu kay toosi weysnayd oo markasta waxaa aan waayi jiray lacagtii aan qaadka iyo qalabkiisa ku iibsan lahaa, caawase si bilaa lacag ah ayuu agtayda ku yaallaa, waa hubaal lacag farabadan ayaa lagusoo qaaday se lacagtayda maaha mana dalban anigu, waxaase ii cad in uu yahay dabin la ii dhigaayo oo waxa la iga rabo ayaa kasii weyn intaan iyo labalaabkeed.

Dhammaanteen qayilaad ayaan billownay, si daggan ayaa loo marqaamay, qof kasta waxaa uu dhistay hummaag isaga u gaar ah oo uu been iskaga dhaadhicinayo, waxaa laga sheekeeyey haddii markab la soo qabto ee lacagta laga qaato, qof kastana la siiyo lacagta uu leeyahay iyo saamigiisa.

Ninkasta waxaa uu sheegtay arrimo tiro badan oo been abuur ah oo aanay waxba ka jiran, waa marqaan iyo xaalkiise qof kasta isaga ayaa cirka isla maraaya oo maba jiro qof ka sarreeya waxaa uuna iskumaleeyaa kan dunida ugu sarreeya oo waxaa uu isku sharraxayaa qof aan laga sarrayn.

Waxaa la gaaray habeen bar oo waxaana bilaabatay taskiilintii iyo in si dhab ah la iskaga dhaadhiciyo in la shaqato oo gaalada laga nabad gali waayay laga soo afduubto hantideeda sida

sharci darrada ah u maraysa, oday cusmaan oo ahaa maalgaliyaha ayaa inoo yimid waxaa uuna hadalka ku billaabay inaga oo kalluumayste yaal ah dadkii aan ka nabadgali weynay go'aan ayaan ku qaatay in aan kula dagaalamo awood aallad iyo afba, wixii lacag iyo hub ah ama quud iyo qayilaad ahba aniga ayaa la diyaar ah ee ma i tusi kartaan kartidiina iyo adkaysigiina xagatinta cadawga aad u adkaysanaysaa ?

Wajiyadiinna macdan nooca ugu qaalisan ayaa iiga muuqata waxaana idinka muuqata geesinimo dheeraad ah iyo ad-adayg ee muruqiinna maala oo xoolihiina dhacsada oo gaalada baddeenna sharcidarrada ku qaraabanaysa aan isku kaashanno in aan iska qabano oo aan iska dhicinno, mid kasta oo idinka mid ah waxaa uu awoodaa inuu gaalada sharcidarrada ku socota uu dhagta dhiigga u daro isaga oo kaashana walaalihiis.

Wax Allaale wixii aad u baahataan oo aad gaalada kula dagaalami lahaydeen waa diyaar ee xoogga u sheegta oo is diyaariya in aad la dagaallantaan ilaa ay iska dhiibayaan, intaan waa dardaaran guud ee aan halkaa uga haree, aana usoo laabto ragga cusub ee halkaan kusoo biiray oo runtii aad aam ugu farxayo waxaan hubaa haddii ay dadaalkooda xoojiyaan in ay gacantooda sabab u noqon doonto guusheenna, waayo waa rag adag oo awood u leh in ay gacantooda wax badan ku sameeyaan.

Raggaas waxaa ugu dambeeyay ninkaan faarax ah oo tijaabadii laga qaaday wax aanan waligeeyba qof ka filayn sameeyay, waxaa uu sameeyay wax aanan marsadaan horay looga samayn. waxaa hubaal ah faarax haddii uu doonta sidii uu tijaabada uga soo baxay, oo uu markabka ugu weecinayay uu markii sida dhabta ah markabka loogu tago uu ugu

weeeciyo, waxaa hubaal ah in aanu markabkaa fakasho lahayn.

Runtii faaraxow waxaan kugu dhiirrigalinayaa sida aan motoorkaas gacankiisa u qabato in aadan sii dayn oo aad ku shaqo tagto haddii lasoo qabto waa guul haddii lasoo waayana waa dow oo guul iyo guuldarraba waa loo joogaaye.

Faaraxow xirfaddaada wadista ka faa'iideyso oo raggaan dhiigooda huraaya ku biir oo qalabkaan qaado guush inay dhinaceenna tahay ayaa laga yaabaaye waxaana kuu ballanqaadayaa habeenkaan aan isla joogno haddii guushu inasoo wajahdo in aan laba saammi kusiiyo oo aad hantidaas qaadato, waana ballan nin weyn intaas oo rag ah ayaana i maqlaaya.

Faarax tijaabadii waad ku guulaysatay waxaana mudaysatay laba naaquude booskood waxaana

kuu ballan qaadayaa maalinta aad markabka soo qabsataan in aad booskaada ku badalatid cid Alle cidda aad jeceshahay adiga oo labo qof mid walba boos horleh gashanaya.

Waxaan filayaa in aan ku hadlay hadal qofi ku shaqo tagi karo faaraxna waan filayaa in uu hadalkayga si quman ugu duxay. Haddii uu jiro qof wax dheeraad ah iga codsanaya waa uu furan yahay dalabku, waxaana ballan qaadayaa in aan jawaab fiican siiyo wixii karaankayga ah".

Sidaas markii uu yiri milkiilihii ayay dhammaan xaaladeydii badalantay waxaana i gashay rajo xoog badan taasoo ahayd in aan shaqatago oo aan doonta ugu dheeraynta badan anigu gacanta ku dhigo sida uu milkiilihii ka dhawaajiyayna aan qaato labada saammi ee uu carrabbaabay.

Isla halkii ayaan ku muujiyay in aan aqbalay waxaana u sheegay in sidii aan gacanka u qabtay uu yahay oo aan horay u socod ahay saacaddaas laga billaabana aan shaqo tagay, xitaa haddii aan markaa soo waayo oo aan soo laabto aniga oo nabad ahna aan mar kale shaqa tagi doono haddii aan fursad u helo.

Milkiile cusmaan ballan qaadkiisa oo la isku hallayn karo iyo goortaa oo dhallinyaro badan oo aan is naqaanay oo inta ay soo qabsadeen ka lacagaystay dartood aniguna hammi cusub ayaa igu dhashay, wixii aan muddoba niyadda ku hayay oo aan ku haminayay ayaa caawa iila ekaaday mid aan ku dhaqaaqi karo.
Guubaabo dheeraad ah ayaa igusoo korortay, jirka oo dhan ayaa i dubaaxiyay, waxaa aan sawirtay aniga oo soo qabsade noqday oo lacag aad u farabadan oo intaan dhul gatay oo dhistay haddana ku caana maalay, waxaa aan sawirtay

aniga oo inta hanti samaystay gabadh yar oo cad guursaday.

Waxaa aan sawirtay aniga oo inta gaari cad qaatay magaalada ay dan igasoo gashaba daqiiqado yar ku tagaaya, waxaa ii sawirantay aniga oo ay magaaladu iga dambeyso oo sacabka la iga daba tumaayo, waxaa ii sawirantay aniga oo inta lacagta soo qaatay masaakiinta lacag siinaya. Waxaa ii sawirantay aniga oo aroos ah oo la igu galbinayo gaariyaal aad u farabadan oo qaarkood loo maleeyo in boqorro ay lahaayeen.

Waxaa aan sawirtay aniga oo la aqalgalay gabadh aan inta aan magaalada joogtayba ugu jeclaa, oo inta guri heersare ah la dagay aan sheeko wadaagnahay, inyar kadibba aan wada qoslayno xaafadda oo dhanna ay leedahay Alla kuwaan isku wacanaa! Allow isku kiinna daa.

Qaadkii aan cunayay oo aan ku mirqaamay ayaa iisii qurxiyay oo arrintii iiga dhigay dab iyo holac

iyo wax in aan dhaqaaqo uun iga xigaan, naftayda ayaan dhawr mar canaantay oo aan ku hiifay in ay dib ii dhigtay oo fulaynimo iyo wax loo kala garanwaayay dabbaalnimo ay i haysatay.

Waxaa ila dheeraday inta qaadka la tufo la isku diyaarinayo in magaalada laga dhaqaaqo, kuwii ila joogay ayaan ku idhi miyaynaan is diyaarinayn oo aanan baxayn? Maxaan u fadhinnaa oo aan isku dib dhigaynaa kollay waad marqaanteene. Sow ballantu ma ahayn in marka aan marqaanno aan alaabada gaariga saaranno oo aan xeebta isku shubno isla habeenimadaana aan qadka soomaaliya ka baxno oo aan badda habeen mirno.

Ragii waxaa ay iigu jawaabeen waayahay oo waan baxaynaa balse waxaa aan sugaynaa inta uu ka imaanayo

maalgaliyaha, qof ayaan u diraynaa si uu usoo kiciyo oo uu inoo sagootiyo, gawaarida waala diyaariyay magaalada dhexdeeda ayayna ku diyaarsan yihiin kaliya waxaa inoo dhimman in uu maalgaliyuhu ina sagootiyo, jaranjarooyinkii iyo gaarigii qaadi lahaaba waxaa ay diyaar ku yihiin, goobta laga ambabaxayo ee ay alaabtu ku diyaarsan tahay.

Waan farxay sidii nin loo ballanqaaday inuu lacagta hadda qaadanayo, waxa iga farxinayay ma ahayn in aan baxayo ee waxaa ay ahayd riyadii aan hadda sawiranayay oo u ekaatay mid hadda rumoobi rabta.

Yaa markaa i yiraahda meeshaan iskaga tag inta aadan kurbo iyo walwal ugu dhibaatoon, wixii dhici raba kumanaansano ayay kaa weyn yihiine, habeenkaa xitaa

haddii la i dhihi lahaa tiro ari ahvbaa lagu siinayaaye joog ma aanan joogi lahayn, waayo sawir quruxbadan ayaa iisoo muuqday oo riyadii ayaa u ekaatay mid rumoobi rabta maadaama ammaantii uu i ammaanay maalgaliyaha iyo ambabaxayguba isku mar noqdeen.

Guubaabo aan xad lahayn ayaa naftayda ku socota oo arrin kastaa oo timaadda waa ay isii dhiirrigalinaysaa, intii alaabta la raraayay, waxaa aan muujiyay fud fudeyd iyo feejinaan dheeraad ah, taasi waxaa ay ka hadashiisay maalgaliyihii isaga oo leh, wallee nin meel kasta ku fiican ayaad tahay. Saaxiib haddii aad tan kusoo bayl qaaddo aniga ayaa dukaan kuu furaaya ama shaqo kale kuu abuuraaya, nin laba nin iyo ka badan udhigma ayaad tahay e.

Waxa kale ee aadka ii guubaabiyay waxaa ka mid ahaa in gabadhii aan jeclaa oo socota ay meeshii timid oo iyada iyo hooyadeed oo wada socda ayaa keenay hilib iyo bariis si wanaagsan loo habeeyay, waxaa ay ahayd arrin aad ii dhiirri galisay in koox aan anigu hoggaamiyo ay gabadhii aan jeclaa xilligaa u soo kacdo oo ay cunno ii diyaariso, kadibna si naxariisleh ay ii fiiriso iyada oo leh ilaaheey ha idinguuleeyo. Waxaa igu dhalatay sahan farxaddeed oo cusub waxaana dareemay in rajadaydii ay u dhawdahay in ay rumowdo, oo aan noqdo soo qabsade nasiib-badan, dhamman rajooyinkaygiina aan kadhabeeyo oo Alle sw ii u rummeeyo.

Warka ayaanan kugu dheerayne isla habeenkii saq-dhexe ayaa waxaa inoo yimid maalgaliyihii oo gaarigiisii caddaa wata, isla markiina waxaa

billaabatay is diyaarintii iyo isku dubba ridkii socdaalka, qofkastaa wuxuu qaatay wixii muhiimka u ahaa oo uu aadka ugu baahnaa sida waxyaalaha macmacaanka ahaa, balwadda sida sigaarka iyo tubaakada, waxaa uu qaatay wixii lagama maarmaanka u ahaa. Anigu waxaa aan qaatay sigaar iyo liin dhanaan aad u badan oo mar uun in ay i anfici doonto ay suurta gal ahayd.

Raggii oo dhan oo aan anigu ka mid ahay, ayaa meel la isugu geeyay, waxaana la inagu yiri, "isku imaadda gaarigii xeebta idiin qaadi lahaa ayaan diyaariyay oo daqiiqado kadib idinkusoo wajahane",

Waxba kama soo wareegane daqiiqado kadibba waxaa yimid gaari ay jaranjaradu ku qaantooran tahay oo xawaare xooggan ku socda. Gaarigu waa nooca loo yaqaano toyota hilux oo laba shirleh gadaalna bir dheer looga xiray si aanay jaranjaradu u dhicin, waxaa wada mid aan is idhi ugu yaraan toban gaari waa uu kharibay, waayo

gaariga waxaa uu u waday si xadka ka baxsan oo aad u malaynayso inuu cadaw ka baxsanayo, oo col oodda soo goostay uu ka cararayo, si xadka ka baxsan oo naxariis la'aan ah ayuu agteenna gaarigii ku joojiyay isaga oo joojiyaha si xadka ka baxsan u qabtay.

Dhagaxdii quruuruxa ahaa oo uu firdhigayay sheegga gaariga ayaa dadkii mid uu ku dhacay iyo mid uu halis galiyay ka dhigay. Raggeennii qaar ka mid ah ayaa carooday oo yiri maxaad sidaan inoo yeeshay waad inoo jeedaaye ! Se waxaa loogu jawaabay adeer xabbad run ah oo gaal soo ridayo ayaad u socotaane ma shalaalaxaan yarbaad ka cabaadaysaan ? Waar waxaas wax la sheego malaha ee isku xishooda, markaa ayaa afka la kala xirtay oo nin waliba aammusnaan doorbiday ileen waa la is xifaalaynayaa oo ninwaliba geesinimo aanu lahayn ayuu iska raadinayaaye.

Waxaa gaarigii kasoo dagay ninkii maalgaliyaha inoo ahaa oo aad u labbisan bustoolad cabbaysanna wata, waxaa uu yiri gala gaariga oo is qaybiya, ragga dhallinta yar sida hebel iyo hebel kor ha fuulaan intii yara culus oo aan kor isku celin kariinna shirka ha galaan, nin walibana qoragiisa ha ubsado oo inta wadada lagusii jiro ha sii baroobaysto, ileen magaalada dhexdeeda baroobada sideedaba kuma wacno e.

Waan kornay aniga waxaa aan ku jiray dadka gaariga Sagxadda kore ka raacay oo waxaan ahaa nin dhallinyaro ah markaana fududaa oo meelkasta ku boodi karay, damacsanaa in aan inta aan wadada kusii jirno aan dhawr baalooto sii rido maaddaama aan xiiso ba'an u qabay xabadaha. Waala dhaqaajiyay gaarigii milkiilihii gaariga oo ahaa isla maalgaliyaha shirkadda, markii uu inagu hubsaday in aan gaariga wada raacnay waa uu ka dagay gaarigii waxaa uuna

raacay gaari kale oo ahaa nooca soomaalidu ay u taqaanno (laylo) oo markaa soo istaagay.

Markii horeba waa la sii qayaasi karaayay qaabka uu gaarigu u dhaqaaqi doono marka uu magaalada ka oo magaalada dhexdeedii ayuu ku waday xawaaro xad dhaaf ah, anigu waan ku talagalay oo waxaan isku diyaariyay in gaariga oo xawaaro sare ku socda aan xabbado rido aniga oo aan dhacayn ama booskayga haysya, meel aan isku celin karana salka ayaan la helay.

Magaaladii waa laga baxay xawaaraha gaarigana marba marka ka dambaysa waa la sii kordhinayaa, aniga iyo afar kale ayaa gaariga gadaal ka saarnaa, mid inaga mid ahaa ayaa qaylo ka bixi waayay kadib markii uu is yiri armaad gaariga ka dhacdaa!? Waxaa aan ka baqnay in gaarigu inala gaddoomo, waxaa laga gaaray meel dhagax ah oo wadadu ay xumaanayso mararka qaarkood se wadaha

gaarigu waa mid lasoo xulay oo aan waxaasba dan ka lahayn cabsi iyo walwal toona kuma jirto. Waxaa inyar inoo soo jira gaarigii kale oo isagana ay saarnaayeen maalgaliyihii iyo lataliyeyaashiisi, iyaguna xawaare sare ayay ku socdaan oo wadaha gaariga uwada waxaa uu wax la qaybsanayaa mid kaan igana gaariga inoo wada oo aad moodid in la yiri gaari waad wadid gaddoomi mayo.

Xeebta aan u soconaa ma dhawa oo waa meel gaariga dheereeyaa uu u socdo saddex saac iyo bar, halka gaadiidka qaarna ay ku qaadato afarsaac, bari ayaan u heehaabaynaa wadada gaarigu ku socdana waa mid jay rafa ah, oo gaariga xagtiisu ay dhagaxda yar yar ay hareereha u kala dirayso, waxaad mooddaa wadaha gaarigaani in waddada noocaan ah waayo waxaa uu lugta gaariga la raadinayaa waddaba midda ay ka habboontahay, intii uu waddada kusoo socday marna ma dhicin inuu

ku dhaco waddo xun oo god dhagax ama geed leh,

Waxaa laga baxay waddadii jayga ahayd waxaana la galay waddo xagaaf ah, oo lugta gaariga uun ay fashay halisteeduna badan tahay, maaddaama ay qalqallooc iyo god iyo doox isku daratay, suurta galna aanay ahayn in lagu socdo xawaarihii markii hore lagu socday oo waxaa la dhexjibaaxay buuro iyo dhagax waawayn oo ay waddadu kor marayso.

Mararka qaar ayaa kaymo lagu soo dhexdhacayay, markaas oo kale waxaa taxadder dheeraad ah u baahan xoolaha geedaha waddada dhexdeeda ku yaalla daaqaya, waxaa dhacda in neef geela oo geed waddada dhinaceeda daaqaya uu mar qura wadada iskusoo jaro oo sidaasna gaarigu ku dardaro. Arrintaasi waa mid aad u dhibbadan oo qofka gaarigaa wada waxaa laga yaabaa in ciddii

neefkaa lahayd haddii ay arkaan ay dhibaateeyaan, oo marar badan ayay dhacday in sidaas oo kale la yeelo.
Dhawr darawal ayaa la mindiyeeyay iyaga oo is leh neef dad leeyahay ayaa dardartaye bal sug ciddii iska lahayd sidaas darteedna sugaya in cid u timaaddo, amaba raadinaya ciddii iska lahayd, waana arrin laga fiican yahay, waayo qofkaas oo kale in wanaag wax loola dhammeeyo ayuu ku fiican yahay, haddii uu xumaan doonayo waa uu iska tagi lahaa.

Rasaas ayaan roobka ka dhignay anaga oo doonayna in wixii waddada ku sugan ay ka cararaan oo ay dhawaaqa xabbadda, baroobadii inaloo ogolaa waan fulinnay waxaana la fiirsannay xilli ay mudnaan goonni ah leeyihiin, halkii dhagax ayaana laba shimbir ku dilnay igana oo ka faa'iidayaanayna xabbadaha inaloo fasaxay. Waddadii waxaa ay noqotay mid yara

siman oo aan jajabkeedu badnayn, Xawaarihii gaariga waala kordhiyay.

Wax aan xawaarahaas ku soconoba mar qura ayaan ka warhelay aniga oo gaarigii ka faniinay oo aniga iyo qoraygaygiiba aan dusha ka fuulnay geed qurac ah oo wadada ku dhinacyaallay, waxaase yaab lahayd markii aan arkay gaarigii oo intuu geed ka dulbooday laba mar isi sii dulmaray meel daad biyo jeexeen ah ku dhacay, waan is fiirfiiriyay, wax dhaawac ahna ima gaarin Alle mahaddiise waan ka badbaaday, markiiba waan soo orday waxaana u nimid gaarigii oo aad u burburay iyo qaar raggii ka mid ahaa oo dhaawacyo daran soo gaareen.

Qoladii gaariga gudihiisa ku jirtay oo darawalku ka mid ahaa waxaa ayba iska furi waayeen, waxaana waajib noqotay in lagasoo bixiyo wixii dhaawac ahna magaaladii loo celiyo, maaddaama dhaawacyo badani jireen oo aniga

laftayda aan isku arkay dhawr dhaawac oo yar yar, se waan roonaaye ragbay lafo ka jabnaayee.

Milkiilihii goorti uu yimid waxaa uu amray in gaariga laylada ah uu ragga inta dhaawac daran ah magaalada u celiyo si loosoo daaweeyo, ragga caafimaadka qabana ay goobtaan ku sugnaadaan inta gaariga laga toosinayo, magaaladii ayuuna u qaylo diray si gurmad loogu soo diro, maaddaama gawaari kale oo uu isaga leeyahay ay magaalada diyaar ku ahaayeen.

Laba gaari ayaa durba loosoo diray si ay gaariga u toosiyaan Alaabtana ay xeebta u geeyaan, gurmad dag dag ah haddii uu gaarigu wado waa in xawaarihiisa la xoojiyo e, taxadarkana la badiyo e waxaa ay meeshii soo gaareen muddo ka yar intii la filaayay, dhaqsadiina alaabtii ayaa lagu raray gaadiidkii gurmadka keenay, halkii ayaana lagasii waday socdaalkii iyada oo la

jiidayo gaarigii rogmaday, waxaan gaarnay goobtii aan u soconay oo ay ku diyaarsanaayeen doomihii badda lagu gali lahaa.

Waxaa inaga horreeyay oo meesha mar hore la keenay laba nin oo qaabishanaa in ay alaabta xeebta taalay ay waardiyeeyaan, markii badda lagalana ay cunnada ku dhex kariyaan gaaddiidka la saaran yahay, waxaa loo yaqaannaa suqayare waxaa ayna qaabilsan yihiin cunno karinta iyo waardiye nimada, gaarigii ayaan ka dagnay isla markiina waxaan u nimid cunno bisil oo cunis kaliya ay naga xigto, waa mallaay iyo bariis si heer sare ah loo diyaariyay ee haddii aad mar uun aragtid aadan dhinac uga kacayn xitaa haddii aad dharag dillaacaysid, carrabka iyo dhadhamada ayaana kaa yeelayn dharagta.

Markii cunnada la cunay waxaa dib inooga laabtay maalgaliyihii iyo dadkii isaga la socday,

oo iyagu aan doonayn in habeenkaa ay meesha seexdaan, waliba maalgaliyihii hawl badan ayaaba u taallay oo gaarigii rogmaday farsamo ayuu rabay, woxooga ka dibba waa ay isla laabteen iyaga oo gaarigii rogmadayna sii jiiday.

Raggii si wanaagsan ayaan isku baranay waxaa ayna ahaayeen laba nin oo aad u firfircoon shaqada loo igmadayna ku habboon oo aad moodayso in ay yihiin kuwo sanaddo lagu tababarayay booskaas, waxaa ay ahaayeen kuwo ay kaa yaabinayso qaabka ay cunnada u karinayaan ama qaabka ay iskula helayaan wax walba waxa ay uga macaan yihiin waxa kale tusaale ahaan mallaayga suugaysan wax uga macaan ma jiraan, haddii aad dhadhamisidna waxaad xaqiiqsanaynaa khibradda fog ee ay labadaas nin u lahaayeen cunno karinta.

Muddo markii aan meeshii iska ciyaarnay oo ninba ciyaartii uu jeclaa ciyaaray, qof la

ciyaartana helay, ayaa waxaa lagu murmay anaa shiish badan iyo anaa kaa daran, warku intaanu badan ayaa waxaa la isla aaday goob ka fogayd marsada oo waligeedba lagu shiishtami jiray, nin walibana waxaa markiisa loo qotomiyay kob dacas ah, kadibna waxaa la yiri shiish.

Rag badan oo faanku uu ka sarreeyay waa ay shiiqiyeen, waxaana laga waayay mid xitaa kobta dhulka kaga qaada xabbadda, waa la hareer marayeen xabbadda, faankoodiina halkaa ayuu ku sharjabay, waa ayna awoodi waayeen xitaa in ay mar kaliya la helaan xabbadda.

Aniga ayaa markaygii la soo gaaray, waana is diyaariyay aniga oo qoriga xabbad raacsiistay, waxaana isku diyaariyay inaan liiftanka rito oo aan wacdaradayda shiishka ee aanay cidna iga filayn rito, waxaan idhi anigu aad uma aqaani shiishka se adinkaba boqollaal xabbadood ayaad riddeene waadna shiishtan teene anna aan markayga shiishtamo.

Qoraygii oo ahaa nooca loo yaqaano AK47 ayaan xabbad raacsiiyay liifkana u qabtay, kumaba dheerane isla markiiba Xabbadii koowaad ayaan riday, waana la dhigay(la helay) kobtii, kuwo badan oo i dhahayay liif ma taqaanide kalluumaysi ayaad taqaanaaye qorayga ha isku diline doontada wado ayaa aammusay oo afkala qaad kasoo haray.
Mar kale ayaa kobtii la taagay haddana waan la gaddiyay (waan ku dhuftay) waxaa lagu wada qayliyay waar ninku shiishbadanaa !

Mar kale oo kama dambays ah ayaa la ii taagay kobtii, ma seerayna dhag ayaan ku siiyay, nimankii shiishyahannada isku sheegayayba aniga ayaa kasii darnaaday, mid kastana waa ii qiray in aan ahay mid liifka ku xeeldheer, intii ay iga aamminsanaayeen, waxaa dhacday in ay iga codsadaan dhammaantood inaan qorayga wax ka baro waayo waxaan tusay in liifku yahay hibo qof lahaan karo.

Waa laga soo kala tagay waxaana goor casal liiq ah la yimid golihii oo shaah aad u udgoon uu ku diyaarsan yahay, shaahibaa la cabbay waana la kaftamay, habeenkii halkii ayaa la joogay qayilaadna ma jirin habeenkaa, kaftan iyo xifaalo ayaa lixdii saac oo habeennimo lagu gaaray, hurdada xeebtu waa ay ka macaantahay hurdo kasta oo meel adduunka ka mid ah la seexdo, waa carro kulul oo camuush ah, waxaa wehliya adiga oo kalluun kulul cunay oo hurdadu aad kuu hayso ayaad seexanahaysaa, waxaad hurdaysaa hurdo aad si wanaagsan u qabatimaysid.

Waala seexday, se anigu habeenkaa dhaqsaba si wanaagsan umaana hurdin oo waxaa i dhibaysay Bahal yar oo Carsaayo la yiraahdo, waa bahal yar oo dhinicii uu doono u ordi kara, kaasoo marba dhinac u cararaya marka aad damacdo inaad cayrsato.. markii hore ayaan

badleey ahaa oo badda iyo wixii la xiriira waan isku fiicnayne goor dambe ayaan shabaag isku saysaabay si aanay mar dambe iigu imaan, markaa kadib ayaan xoogaa seexday.

Waagii ayaa baryay waxaana markiiba la iskugu yimid ardaa goor hore la sameeyey oo loogu talagalay in lagu kulmo, waxaan sugnaba waa gaadiidka magaalada ka imaanaya oo keenaya rag cusub oo shaqataga, hubkii aan badda ku gali lahayn waa diyaarsanaa oo waxaa uu ku diyaarsanaa golaha aan joognay, si aanay waxba isku badallina waxaa aan ku duugnay dhulka annaga oo adeegsanayna bacaha roobka laga galo.

Maalintii labaad ayaanu halkii iska joognay inaga oo marna ciyaarayna marna seexanayna, ninkii rabana uu badda ku dabaalanayo, se aniga xiiso goonni ahba baddu iguma hayso waayo sanad kasta ayaa ka shaqayn jiray waxaa ayna ahayd

mid aan aad u fahamsanaa waxaana isku hawlay in aan sii diyaariyo waxyaabihii loo baahan karayay marka badda la galo sida in aan doonta saaro shabaag kalluumaysi si haddii ilaalada badda ay ina arkaan aan iskaga dhigno qolo kalluumaysi ah oo soo qaldantay.

Habeenkii xigay ayay yimideen gawaaridii aan sugaynay oo ay ku raran yihiin qaad iyo waxyaabo kale oo sagootin ah, waxaana la sheegay in habeenkaa la qayilayo, markii sagaalsaac oo habeennimo la gaarana la guurayo oo sidii ayaa lagu marqaan billaabay, oo qofkastaa canka buuxsaday, waxaa la isku af gartay in toban iyo laba nin ay caawa baxaan oo ay safarkaan badda galaan inta soo hartayna ay bisha kale tagaan.

Maalgaliyuhu ma qayilo qaadkana waxaa uu ka aamminsan yahay maandooriye nijaaso ah haddana isaga ayaa soo iibiya oo lacag farabadan ka bixiya wax kale kama rabo kaliya

qorshihiisu waa in uu ragga uu badda u diraayo uu ku tashkiiyo oo inta ay qayilayaan ayuu tashkiilis iyo qiiro galin dheeraad ka dusha uga raraa isaga oo u sawiraaya nolol qurux badan oo aanu qofku marnaba maya dhihi karayn, dhinaca kalena ka qarinaya haadaamooyinka waaweyn ee ka sokeeya.

Maalgaliyihii ayaa sheegay in dadka uu magacooda yeerin doono ay safarkaan bixi doonan inta uu ka tagana ay safarka dambe bixi doonaan. Waxaa aan ka mid noqday dadkii ugu horreeyay ee uu maalgaliyuhu magacaabay, waxaana noqday qofkii koowaad ee uu magaciisa soo yeeriyay. Waan farxay maaddama aan jeclaa inaan ka mid noqdo dadka ugu horreeya safarkaa baxaaya, nasiib wanaag waaba anigaa ka mid noqdayba.

Sidii in jannadii la iigu bishaareeyey ayaan u farxay xaadda oo idil ayaa i dhaqaaqday, isla

markiina dag dag ayaan isku diyaariyay waxaa aan billaabay in aan sii diyaariyo shabaq yar oo kalluumaysi kaasoo aan ugu dan lahaa in aan ku beenguurno haddii ay ilaalada badda ina arkaan, oo aan iskaga dhigno kalluumaysato soo luntay, doontii aan wadi lahaa ayaan diyaarsaday oo waxyaabihii yar yaraa oo u dhinnaa ka habaystay, waxa aan ka dhigtay mid dhaqaaqid u diyaarsan.

Waqti la sugaaba waaka yimaadda e, daqiiqaddiiba daqiiqadda ka dambaysa waxaa ay usii siqaysay saacaddii lagu ballansanaa, oo ahayd sagaalka saac ee habeennimo, raggii qaar, qaadkii ayay tufeen oo jiif ayay isku qaabiyeen, qaarna qayilaaddii ayay sii wateen iyaga oo leh waxaa tufaynaa marka aanu baxayno oo aan doonta fuulayno. Inta ka horraysana qayilaaddeenna ayaan wadanaynaa maaddaama caawa ay inoogu dambayso qaad

aan bannaanka ku cunno, goorta xigta ee aan cuni doonnana aanan garanayn.

Daqiiqadaha waxaa la moodaa in ay isku baddaleen saacado, halka saacadihiina la moodo in ay isku baddaleen bilo, bilihiina la moodo inay isku baddaleen sanaddo, sanaddadiina Qarniyo. Waxaan sugiwaayay inta laga gaarayo saacaddii lagu ballansanaa bixista, waxaan u tagay maalgaliyihii waxaana ku iri waxa ay ila tahay in aan hubka doomaha saarano si ay diyaar inoogusii ahaadaan, waa igu raacay ragii ayuuna amray in ay soo kacaan oo ay alaabta daldalaan, hubka, iyo jaranjarada ayaa ugu culus, shidaalkii iyo raashinkii awalbaa doonida la saaray, hubkii ayaan qaadnay oo doonidii saarnay, muddo laba saac ah oo ka dhinnayd bixisteennii.

wax la sugaaba waala gaaray xilligii la sugaayay waxaana la kiciyay dhammaan raggii oo dhan si

deg deg ah ayaana la kugu soo xaadiriyay xeebta, bixitaan ayaana la isku diyaariyay, markab lasoo afduubto oo madax furasho laga qaato wax aanan ahayni nooma cadayn, nafteenna halista aan galinayno umaana jeedine waan iska soconay, waxaa aan nahay toban iyo laba nin oo afarba doon loogu talagalay. Afar aan aniga ku jiro waxaa loo qorsheeyay in ay raacaan doonta dheeraysa ee matoorka **lixdanluhu** (60) ku xiran yahay, afar nin oo loogu talagalay in ay raacaan doonta labaad oo uu ku xiran yahay matoorka **afartan**-laha (40) ah ku xiran yahay, iyo afar kale oo loogu talagalay in ay raacaan **foolfaha** kuwaas òo waardiyaynaya qalabka cunnadana ragga u karinaya.

Doomihii yar yaraa ayaan xeebta ku diyaarinay, foolfihiina waala kiciyay, raggii foolfaha raaci lahaana waa ay koreen, waana tagay, foolfaha sidiisaba aad uma dheereeyo oo waa uu socod yar yahay sidaa darteed xilli dheer ayuu iskasii

tagayaa oo wuu iska ambabaxayaa. Doomaheenna yar yar waa ay dheereeyaan oo meeshiiba daqiiqado ayay u soconayaan, waxaan ka dambaynay muddo afar saacadood ah oo qura, foolfihii waxa uu marsada ka baxay, sagaalkii habeennimo ah annagana waxaa aan baxnay halkii saac ee subaxnimo inaga oo uga daba tagnay halkii lagu ballansanaa meel ka xaggaysa. Saacaddu iyada oo ay taagnayd halkii saac iyo afartan daqiiqo.

Waxaan doomihii ku daba xirnay foolfihii, waana fuulnay, shaxdeenii ayaan foolfaha ku dhex cammiranay, ninkii ku qornaa wadista foolfahana waa hawshiisii booskiisii ayuuna xagsaday oo xawaare dhammaystiran ayuu ku waday, waxaa la badda ayaa lagusii fogaaday marba marka ka dambaysana waxaa lagu sii fogaanayay badda, badda ayaana lagusoo dhaqaaqay, maalintii oo dhan ayaan soconay, wax uu foolfuhu rigleeyaba habeenkii ayaa la

gaaray, habeenkii oo dhan ayaan soconnay oo qayilaynay, marma ciyaaraynay.

Maalintii kale ayay inoosoo baxday qorraxdii oo aad moodayso in ay leedahay subax wanaagsan, waxaan joognaa goob cir iyo bad wax aan ahayn aan la arkayn, birri iyo warkii haba sheegin, qorraxda halka ay kasoo baxayso ayaa la aadayaa, jiheeye ayaa la adeegsanayaa mooyaane maba jirto cid garan karaysa,

Waxaa galnay maylal aad u fog, "halla taxadaro waa qadkii maraakiibta ay mari jirreene, nin waliba qoragiisa ha diyaarsado jaran jarooyinkana doomaha saara oo hubbiya in ay isku xirmayaan iyo inkale waxaa laga yaabaa in si deg deh ah uu markab inoogusoo baxo e." sidaa waxaa yiri faarax salaad oo ahaa go'aamiyaha wax kasta oo la qabanayo.

Maalintii oo dhan sidii aan u soconay ilaa laga gaarayay Habeenkii saddexaad oo intaasi aan badda sii jibaaxaynay, foolfaha aan saarrannahayna uu ku socday xawaare aad u sarreeya oo xitaa mararka qaar ay dhacaysay in aannu qolka foolfaha ku hurdi weyno garaaca uu mishiinku garaacayo doonta awgeed, waxaa aan socono oo marba hooseey iyo sahab ina ciyaarsiiyaanba, waxaa la gaaray koow iyo tobankii iyo jajab, habeennimo waa xilliga uu waagu soo iftiimo, taasoo qorshaheennu ahaa inaan weerer markab billowno, waxaan iskusoo diyaarinay foolfaha dushiisa inaga oo qofkii qoray ku qornaa uu qoraygiisa kor u haysto kii doon wadis qornaana uu diyaar u yahay haddii bood ee badda ku dabaalee doontaada inta u tagtid kici la yiraahdo uu diyaar yahay.

Aniga iyo inyar oo ila mid ah mooyee inta kale waxayba ku indha baxsan yihiin oo ay la yaabban yihiin mallaayduulaha waaweynaaday ee inyar ka dibba doonta kusoo dhexdhacaya

isaga oo soo qaldamay, qaar ka mid ah damac ayaaba ugua jira oo waxaaba mooddaa in ay doonayaan in ay cunaan, mase ogaba in wax la cunaba aanu lahayn, balse qofka ay baahiyi hayso waa uu cuni lahaa.

Qoryaha ayaa la raacsiistay xabbadaha nin walba qorigiisii ayuu diyaar ka dhigtay waxaa uuna sugayay inta uu taliyuhu amar ku bixinayo in doomaha la fuulo, waqti iskama lumine amarkiisana maba daahine intuu hareeraha fiiriyay ayuu yiri waar wax markab ah oo iftiimaya ma u jeeddaan, annagana waxaan ugu halceninnay maya maamule uma jeedno ee adiga wax ma aragtaa?

Waxaa uu ku jawaabay haa anigu waan arkaa ee niman indho fiican leh ayaan idin moodaayaye ma qaadkaa idin indha tiray mase baaquli ayaad har fiiriseen dhammaantiin? Halkaas fiiriya (intuu farta meel ku tilmaamay) miyaadan arkaynina waxa halkaa oog ka baxaaaya ?!

Mase haddii aan fiirinay waaba runtiis oo waa iftiimayaa waliba meel aan aad u fogayn, mar qura ayaa la kala orday oo doontii ayaan xarigii ku xirnaa soo jiidna maaddaama ay xarig dheer foolfaha kula xirneed oo uu jiidaayay. Aniga waxa aan lahaa doonta ugu horreysa oo ah midda ugu dheeraysa taas ayaana wadisteeda ku qornaa si xad dhaaf ahbaan usoo jiidnay xarigii ay doontu ku xirnayd. Waan soo gaarsiinay jimbigii foolfaha taasoo ahayd ahayd halkii aan ka doonta alaabta ka saari lahayn.

Waala raray doomihii yar yaraa iyada oo waagii aanu si fiican usoo iftiimin, meeshii ayaan ka xawaaraynay inaga oo aadeyna xaggii uu iftiinka markabka inooga muuqday, doonta aan waa mid aad u dheeraysa oo shidaal badan cunaysa, sidaa darteed shidaalkii ugu badnaa tayda ayuu saarnaa, jaranjaradii dheerayd ee markabka lagu fuuli lahaana doontayda ayay saarnayd, sida la ogaaba doontayda ayaa markabka ku hormaraysa maaddaama ay taydu dheerayso.

Markabkii ugu sokeeyay ayaan u dhawaannay mase waaba noocii aan doonaynay oo waa markab xammuul ah oo alaab kuntineerro u badan ayaa ku raran, waan faraxnay kadibna labada dhinac ayaan doommihii ka dhignay inaga oo rasaas ku billownay, hase yeeshee wax sidii dhimbil dab ah u gaduudan oo aad mooddo xabado ayuu roobka inooga dhigay xabaddii aan ku ridnaba dhimbilo nuucaas ah ayuu ugasoo jawaabay! Waxaan moodaynay markab xammuul ah se waxaa uu ahaa mid loo ekaysiiyay oo kuwa dagaalka ah.

Doontii aan waday dhawr xabbo oo xabadaha uu markabku ridayay ah ayaa ku dhacday, aniga ayay ila raadinayaan xabadda se kama sharyari oo marka ay damcaan in ay markabka jimbigiisa intay soo fuulaan ay xabbado inagu ridaanba waxaa rasaas dabka uga dhiga labada nin ee gaamiradaha dhexe fadhiya dhawr mar ayay matoorka la raadiyeen se uma ogolaan oo waan wiif-wiifinayay waxaana ka ilaaliyay in halmeel

oo qura ay ku ogaadaan oo ay soo nishaabaan, kol markabka ayaan dhinaca u saarayay marna waa ka fogaanayay si aanay doonta ugalin biyaha kulul ee markabka hareerihiisa kasoo yaacaya, (markabta marka ay ogaadaan in ay xaalad halis ah ay ku jiraan hareeaha ayay kasii daayaan biyo si aan loogusoo dhawaan oo aanay doomaha yar yar ugusoo dhawaan).

Kabtankii markabka ayaa dareemay in aanay doonteennu u adkaysan karin biyaha xoogga weyn ee markabka ka rogmanaya iyo firdhaadka biyaha marlabka jimbigiisa kasoo duulaya, waxaa uuna billaabay in markabka uu wiif-wiifiyo oo uu marba dhinac u wareejiyo taasi waxaa ay sababtay in aan ma fogaanno markabka oo aan meel fog ka rasaasayno, si aan iskaga ilaaliyo waxkasta oo ka suurta gali haddii uu inagusoo dhawaado, hubkii cuslaa ee aan ku ridaynayna waa yaraaday oo waxaa inoo haray laba mar kaliya inta la rido, taasi waxaa ay ahayd arrin ina cabsi galinaysay oo haddii uu

markabkaan inaga fakado waan gacan galnay waayoo kuwa dagaalka ee hareerihiisa socda ayuu wargalinayaa waana arrin halisteeda wadata.

Ninkii qorayga wayn haayay waxaa sheegay in rasaastii ay ka dhammaatay, wax uu ku ridana aanu haysan oo uu rasaas la'aan yahay sidaa darteedna uu qorayga weyn iska dhigi doono, oo uu mid yar qaadan doono, sidii ayuuna yeelay. Goortii markabkii laga daayay hubkii cuslaa ayuu billaabay in uu kor u tuuro baaruudda holacda oo digniinta ah, maaddaama ay waabarigii ahayd mugdi yarna jiray (xilliga salaadda subax la tukado ay ahayd) waxaa uu si isdaba joog ah u riday baaruuddaas holcaysa, taasi waxaa ay inagu noqotay masiibo weyn oo inasoo foodsaatay wax aan samayno maaddaama aannan haysanna waa ay ina niyad jabisay oo cabsi horleh ayaa inoo billaabatay.

Arrinta kale ee muusta ina galisay waxaa ay ahayd in ninkii matoorka sidaalka u kala

baddalaayay marka uu kaydka shidaalka faaruqana ku shubaayay uu lasoo booday war joojiyeey shidaalkii waa dhammaadaye! " hal labaatanle ayaa haray ! Gacantii aan ku haayay gacanka matoorka ayaa awood beeshay oo waxaa aan xajin waayay gacankii.

Waxaa ii cad haddii halkaa shidaalku inooga go'o in aan goobteenna ku dhammaandoonno, ama in ay inoo imaandoonaan ciidanka mariinayska ah ee ilaalada badda, kuwaas haddii ay ina qabtaanna xabsi waddan kale ahbay inagu shubi doonaan, taasina faa'iido goonni ah inooma laha hase yeeshee waxaa ay ka roontahay in aan meesha baahi iyo aqso ugu dhimanno.

Markabkii xawaarihiisi ayuu iskagasii socday oo maba hakan waxaa uuna sidii usii tuuryaynayay baaruuddii holcaysay ee uu cirka u diyaarar, sida la ogyahay baaruuddaas waxaa ay u dhigantaa qayla dhaan, anagana waan dareensanayn in diyaarado qadka soo gali doonaan oo ay

xaalladdu is badali karto, digtooni dheeraad ab ayaan qabnaa oo mar hore ayaa warbixinteenna loo gudbin karay maraakiibta dagaalka ee hareeraheenna ah.

Hubkii iyo jaranjaradii ayaan badda dhignay waxaana iska dhignay kalluumaysato soo qaldantay, wixii hub qaali ahaa ee doontaa saarnaa badda ayay dhexgaleen, inaga oo fara maran ayaan doonta dhexeeda iskugu nimid waxaana fiirinay shidaalka aan haysanno inta uu la egyahay waxaana inoosoo baxday in shidaalkaasu aanu meel na gaarsiin karayn, nin waliba talo ayuu soo jeediyay, rag aan anigu ka mid ahaa waxaa ay yiraahdeen doonteena aan iska dhex joogno oo aan badda iska dul sabbayno markii aan u jeedno meel ay suurta gal tahay in aan ku badbaadno marka aan aragnana aan shidaalkaan yar ku gaarno meeshaas.

Qaarkalena waxaa ay yiraahdeen hadda aan ku laabano shidaalkaan yar oo aan haysanno

maaddaama laga yaabo in aan foolfihii iyo doontii kale mid uun soo helno, cunno fiican oo intaas aan sabbaynayno aan cunno ma haysanno inyar oo timir ah iyo xoogaa biyo ahbaan wax dhuunta la mariyo ka haysannaa, ee aan doontii kale ee nala socotay ama foolfihii raadino, haddii aan weyno waa la iska sabri karaaye.

Warkii dambe ayaa la qaatay, oo waxaa aan isku daynay in aan dib ugu laabano foolfihii aan muddada saacadda ku dhaw kasoo maqnayn intasna aan ku soconay xawaare xad dhaaf ah, nasiib xumo waxaa aan garanweynay jiro aan aadno maaddaama doontii ay muddo sabbaynaysay dhinac walbana mar u jeedsanaysay iyada oo dabayshu ay hagayso, waxaa aan isku raacnay in xilligaa meeshii ay doontii u jeedday aan iska aadno maaddaama laba qof ka mid ah afartii qof ee doonta saarnayd ay isku raaceen.

Xawaaraha ayaa loo badiyay halkii ayaana lagu haloosiyay muddo daqiiqado ah markii xawaare sare lagu socday oo aanan waxba la arkin ayaa lagusii adkaysan waayay in halkaa foolka lagusii hayo. Waxaa loo weecday dhinac kale oo uu soo jeediyay nin kale, amminyar ayaa lagusii xawaareeyay dhankiisiina se waxba isna kamasoo naasa caddaan, oo waxaa sii muuqday cir iyo bad isisaaran oo aan wax sumad iyo calaamad ah lahayn.

Shidaalkii yaraa ayaa asna markasta oo la dhaqaaqoba sii yaraanaya, waxaa marba marka kasii dambaysa sii xumaanaya rajada aan ka qabnay in aan raggii kale helno, waxaa kasii daran cunnada aan sidanaa wax sii jirmaad leh maaha, suurta galna ma aha in ay goob fiican ina gaarsiiso, inyar oo timir ah iyo in biyo ah ayaan wax afka lala aado ka haysannaa, haddii doonteenna aan dabaysha u deyno oo ay iska daaddo waxaa suurta gal ah in sanad iyo ka badan aan badda dulsaarnaanno.

Bal ka warran hal sano laba kiilo oo timir ah ma la isku celin karaa mase suurta galbaa in lagu noolaado intaa muddo le'eg ? Inyar ka dib matoorkii ayaa shidaal la'aan isku damiyay, waa wax la sugaayay oo nabar mooyee naxdin malaha, qof waliba booskiisii ayuu murugo iyo shalaysto iyo uurku taallo la fariistay, duco iyo Alle bari ayaa lagu aruuray ninkasta xoogaa timir ah ayaa agta laga dhigay si marka uu nafta u yaababa uu halxabbo uga liqo.

Afar maalmood iyo habeenadood ayaa ina dhaafay, waa soojeed iyo is celi, baddu waa bad wajiin oo waxaa dhacaya sahabyo waaweyn oo mararka qaar ayaa caddil lagu aruurayaa oo hooseey waaweyn ayaa intay doonta dhinac kasoo galaan halis galinaya in ay gab tiraahdana waa laga baqayaa.

Habeenkii oo dhan doonta ayaa la caddilayaa si looga ilaaliyo in ay gaddoonto maaddaama ay halis tahay, caddiliddu waa in doonta la isku miisaammo oo dhinaca ay u badato mooye

dhinaca kale loo boodo, halkaana culayska la saaro si loosoo celiyo doonta.

Waxaan badda dul sabbaynaba waxaa la dhammaaday intii yarayd ee timirta ahayd iyo biyihii, waxaana timid baahi iyo oon meelkasta oo ay jireen! Waxaa la waayay wax afka lala aado, indhihii ayaa xayiigmay, mid walba oo inaga mid ah waxaa uu ka quustay inuu noolaado, waxaa uuna filayay inuu halkaan ku dhimmandoono.

Waxaan aamminay in aan halaagsannay oo qofka ugu dambeeyaa uu doontaam ku dhex dhimman doono, maaddaama cunno iyo cabitaan middoodna aan laga helayn doontaan, haddii aanu ilaaheey cid inoo soo dirin.

Waan dardaarannay nin waliba waxaa uu ka dardaarmay wixii uu ka dardaarmi lahaa,

quusasho nololeed tii ugu dambeysay ayay gaartay, nafta ayaa buurtaas la isla saaray, raggaa doonta saarnaa qaar ka mid ah haddii ay badda ku dhacaan sidii dhagax ayay u kiidayaan oo wax dabaal ah ma yaqaanniin.

Qofkastaa waxaa

Annaga waxaa inaga darnaa doontii kale ee inala socotay oo iyadana luntay intii aan markabkii baas cayrsanaynay, sababta oo ah xitaa shidaalkoodu waa ka yaraa keenna, wax cunno ahna umaba saarnayn oo waxaa ay filayeen in aan isla socon doonno,

Foolfaha iyo intii saarnayd waxba kama ay hallaabayn waayo shidaal dhammaystiran, cunno dhammaystiran iyo jiheeye ayay haysteen oo waxaa ay awoodaan in ay dib ugu laabtaan dalkii iyo marsadii aan markii hore kasoo shireecannay, waxaa u daran in ay mariinaysku soo gadaan oo ay foolfaha ka gubaan iyagana qaataan.

Afarteennii nin ee doonta isla saarnayn waxaan is dhaafsannay wada tashi, nin waliba waxaa uu soo jeediyay talo goonni ah, waxaa ugu talo wanaagsanaa ninkii inoogu yaraa, waxaa uuna yiri Inteennaanba dambi ayaan ku jirnaa oo mid inaga mid ah salaadda ma tukado, Ilaaheey (S w) na waan baryaynaa sideebaa ducadeenna loo aqbalaa ? Dhammaanteen aan dharka badda ku daahirsanno oo aan markaa duceysanno, waxaa dhacda in markaa ducadeenna la aqbalo e.

War laguma celin ninkii ee inta dharkii la siibtay ayaa badda lagu daahiriyay salaaddiina halkii laga billaabay oo doonta lagu dhex tukaday salaad aan la aqoon halka qoblada ah, balse taasi ilama aha in ay ahayd gaf aan samaynay waayo anagaba jiho aan u socono qof sheegi karay inaguma jirin, waxaanse ku qanacsanayn in aan salaadda tukannay uun, salaad aan mar hore ka tagnay oo qaar inaga mid ah aanay sanaddo tukan ayaan billownay kolkaa.

Iyada oo sidaa la yahay baahina la yaabban yahay ayaa mar qura waxaa doontii kusoo dhexdhacday shimbir weyn oo intay daashay inay doonta ku dul nasoto damacday, hase yeeshee af baahan ayay soo gashay, halkii ayaana shimbirtii lagu qamuuray oo qayb qayb loo kala goostay iyada oo ceeriin ah dhiiggeeduna baxayo, balse inooga macaan badan malabkii doocaan.

Galab salaaddii casar la tukaday ayay ahays goorta ay shimbirtu inoogusoo dhacdaye, habeenkii si xallad leh ayaan ku gudubnay, inkasta oo hurdo iyo indho gaduudsi toona jirin, oo ay hurdo inoogu dambeysay habeenkii aan foolfaha kasoo dagaynay oo aan markabka weeraraynay, subaxdii waagu markii uu baryay oo aan salaaddii subax tukanay dhawr nadarna ay galeen rag badan oo aan anigu ka mid ahaa, ayaa waxaa noosoo muuqday markab kuwa dagaalka ah oo xaggeenna usoo socda xawaaro

xad dhaaf ahna kusoo socda, mar waan faraxnay marna waanu murugoonnay, sidii uu u soo socday ayuu agteenna soo istaagay laba doomood oo yar yar ayuuna markiiba soo dagsaday, waa ay inoo yimideen waxay ina siiyeen cunnooyin fudud sida buskud iyo caano, waxaa ayna ina weydiiyeen xaalkeenna iyo waxa meeshaan ina keenay, waxaana u sheegnay in aan kalluumaysato ahayn, se matoorkii inaga hallaabay haddana aanu garanayn meesha aan joogno, markiise birri inoogu dambaysay aan joognay meel ka mid ah biyaha soomaaliya.

Waxaa ay inoo sheegeen in markaasi aan joogno meel lixboqol oo mayl ah, suurta galna aanay ahayn in intaasi ay badda inasoo fogaysay, waxaanse u sheegnay in aanan wax hub ah wadan haddii ay cid kale inoo maleeyaan, markii dambe ayay nagu yiraahdeen waxaanu idin gaynaynaa xeebta soomaaliyeed ee idinkugu dhaw, markaasbay doonteennii jimbiga kusoo qabteen laba doomood oo kuwa aaryada ah,

waxayna nagu amreen in aan soo fuulno doonta, sidii ayaana doontii ku fuulnay kadib ayay doonteennii jiideen iyaga oo meel markabka ka mid ah intay fureen ku xareeyey.

Muddo saacado ah markii uu markabkii inala xawaaraynayay oo intaana aan si xur ah markabka dagaalka aan u dhex joognay ayay ina geeyeen qol gaar ah waxa ay ina tuseen khariiddada soomaaliya waxayna inaga weydiiyeen halka aan uga baahannahay, se maba doonayn in aan meel gaar ah sheegano oo taasi mar hore ayaa waxaa inooga digay maalgaliyihii safarkaan, wuxuu nagula dardaarmay goortii uu la soo tagaayay in haddii mariinaysku na weydiiyaan halka aan soomaaliya ka joogno aanan u sheegin meel khariiddada ka mid ah, waayo waxaa u diiwaan gashan goobaha ay burcaddu ka tagaan.

Nasiib wanaag sidii ay inoosoo wadeen waxaa ay ina keeneen meel xeeb ah oo qarar leey ah waxayna inoosoo bixiyeen doomo yar yar oo caag ah kuwaasoo aan lahayn awood ay laba qof ka badan ku qaaddo, waxaa ku xiran matoor yar oo mar adeegsi ah, xeebta ayuu ina keenay matoorkii waana iska dammay, waan ka dagnay waxaana aadnay magaalo inoo muuqatay oo mariinaysku ay inoo sheegeen magaceeda balse anigu aanan markaa ka hor maqal, waxaa iyana in mariisaysku lacag dollar ah ina siiyeen oo qofkiiba lacag afar boqol oo dollar ayaa la siiyay, magaaladii ayaana ku galnay inaga oo doonayna in aan wax ku iibsanno, nin walbana deegaankiisii uu aado wixii lacag ah ee gayn kartana uu weydiisto.

Waxaa aan soo galay maqaayad cunnada lagu sameeyo oo leh meelo lagu qaxweeyo iyo meelo cunnada culus loogu talagalay in lagu cuno, waxaa ay lahayd meelo khaas ah oo

lammaanaha iyo dadka guurkoodu cusub yahay loo diyaariyay oo aad loo qalabeeyay, goobtaas waxaa hawl wadeen ka ahayd gabar yar oo da'deeda aan ku qayaasaayay markaa toban iyo lix ilaa toban iyo siddeed, waxaa ay qaabilsanayd kala hagidda shaqaalaha ka shaqaynaya goobtaas loo diyaariyay lammaanaha iyo dadka guurkoodu cusub yahay.

Waxaa aan dhexgalay dadkii maalmo yar oo aan meeshii joogayna waan kala fahmay waana la jaanqaaday dhammaan dabeecadahooda. Muddo kooban ayaa Waxaan ku noqday qof laga yaqaanno deegaankii waxaana markiiba la kala baxay xirfaddaydii kalluumaysiga ahayd ee aan waligeeyba aqaanay waxaana meeshii ka qabsaday doon markaa baxri qoranaysay oo oo deegaanka laga lahaa, meesha aan ka imid iyo qofka aan ahay imaywaydiine waxay iga hubiyeen xirfadda kalluumaysi ee aan leeyahay,

markii ay ku qanceenna waxaa ay ii qoreen boos doonta ka mid ah.

Hawshaydii ayaan iska watay maqaayaddiina waxaan ka noqday qof macaamiisheeda ka mid ah markastana cunto iyo ciyaar daawasho ayaan u imaanjiray, ciyaaraha aan daawanayaa ma ahayn kuwa waddamada kale inooga yimaadda ee dhaqandooriska leh, ee waxaa aan daawan jiray ciyaar dhaqammeedka sida Sayliciga, dhaantada, jaandheerta iwm. Sida aan horay usoo sheegay, Maqaayaddaasi waxaa joogtay gabar qaabishanayd kala habaynta da'yarta imaanaysa maqaayadda sida lammaanaha. Gabadhaasi waxaa ay aad u jeclayd ciyaar dhaqameedka sideyda oo kale markii dambena waa ay i fahantay in aan aniguna daneeyo waxayna billowdey in ay ii yeerto ama isoo raadiso haddii aan maqaayadda ka maqanahay marka ay ciyaarahaasi soo galaan.

Gabadhii wada sheekaysi ayaa ina dhexmaray, waxaana ogaaday in ay horbannaan tahay, markaas ayuu damac i galay ileen Rag damac haween kama dhammaado e, waxaana is iri ka warran haddaad guur iyo hawlihii u bandhigto waa intaas oo ay kaa ogolaato e, waxaan go'aansaday in aan maalin uun u bandhigto damacayga, se waxaa ila xumaatay aniga oo aan xogteeda si fiican u helin.

Goor galab ah oo salaaddii casir lagasoo baxay ayaan fikir galay oo boqollaal talo rog rogay, midba mid ku badalay, Waxaan rog rogaba waxaa iisoo baxday in habeenka soo socda oo ay kansho fiican leedahay, aan u sheekeeyo uguna dhexqariyo doonistayda aniga oo u sarbeebaya una sarraxaya, markay su'aasha dhexgashana aan u saafo sarbeebtayda.
Waxaan sugoba habeenki waala gaaray, waxaana iska xaadiriyay guri ay habeennadaas oo kale dhalinyaradu isku arki jireen oo meel

goonni ah ku yaallay, aniga si gaar ah ayay tawaan ii saarnayd garaaca wadnaha ayaa aad iigu xoogganaa, waxaana is lahaa maxaad kala kulmi doontaa ma diidmo mase aqbalaad, aniga oo jaraynaya ayaan goobtii tagay warkii aan waday oo aan la dhacdhacayay ayaan si aan ka gambasho lahayn ugu sheegay

Nasiib xumo waxaa la qaatay in aanan u sheegin waayo wax garowsi ah kama helin oo waxaa ay igu ciyaartay qosol iyo dhayalsi ayayna iiga baxday, waa ay i yastay waxaa ayna iga dhigtay qof lunsan oo iska dhawaaqaya uun, dhab ayay iga maraysay anigana. Waxaa ay iila dhaqatay sidii qof ku qaldamay oo iska dhaadhiciyay in uu cirka calaacashiisa soo galin karo, erayada i niyad jabiyay waxaa ka mid ahaa in ay igu tiri " waxaad tahay qof soo galooti ah oo aan magaaladaan deegaan ku ahayn sidee ugu fikirtay inaad aniga guur iisoo bandhigtid adiga oo aan aqoonsi lahayn ? Hooskaaga ha ka

dheerayn oo hankaaga dib u celi, waan iskala qiimo badanahay waana ka hanweynahay inuu nolol ila wadaago nin baadi ah oo dhumaaya e.

Hadalladaa waa run ahaantii waxa ay igu ahaayeen qarracan beerkayga ayay sidii fallaartii dhexduseen, sidii seefihiina dhexjeexeen, waxaase iigasii darnayd markii aan iyadii iska saari waayay oo ay naftaydii sidii saxansaxada roobka iigusoo udugtay, waxaa ay igu noqotay sidii miro bislaaday macaanna ku magacaawnaa markoodii horeba, erayadeedu waxaa ay iiga dhignaayeen sidii dhul abaarsaday ee goor galab ah uu ku da'ay roob mahiigaan ah qorraxduna ay uga daba martay, dabayl roobaad oo aad u qabowna ay soo dhexmartay rayskii dhulka tiimbaday.

Sida ay naftu u jeclaysato ayay taydiina gabadhaa u jeclaysatay, nasiib uma yeelan in aan hanto gabadhaa waxayse ii ahayd mid ka

mid ah masiibooyinkii safarkaa igasoo waajahay, markii hore dammac uun bay iga ahayd oo han rageed uun baa i haystaye, markii dambe waxaa aan go'aan ku gaaray innaan magaaladaasba iskaga cararo si jaceyl keeda iyo muuqeedaba aan uga dheeraado bal Haddii aan illaawayo, ama aan sidaan uun ka roonaanayo.

Goor subax ah ayaan ka dhaqaaqay magaaladii aniga oo badda maraaya, rag badleey ahaa oo aan meeshii isku baranay ayaan israacnay. Raggii afarta ahaa ee aan horay iskula soconayna waan kala lunnay oo waa hore ayaana iskugu kaaya dambaysay, maalintii aan magaalada soo galnay ayaa iskugu kaaya dambaysay, markaasna qof kastaa meeshii uu aadi karayay ayuu aaday.

Markii aan magaaladii ka dhaqaaqay ayaan gabigeeyba saaqmay, xaalkayguna faraha ka baxay, lurka aan goortaa dareemay, markaa ka

hor mid noocaas ma dareemin, jaceylka aan u qaaday gabadhaas waxaa uu i gaarsiiyay in biyaha ay doontu firdhinayso ay iiga dhexmuuqato iyada oo yara qoslaysa, arrintaasi waxaa ay ahayd mid i argagax galisay oo xitaa garaaca wadnahayga sare u qaadday, waxaa igu abuurmay walaac horleh, mid dadkii doonta ila saarnaa ka mid ah ayaan arrintii u bandhigay, waxaa uuna ii sheegay in ay tahay arrin aanu ka faalloon karin, ayna tahay arrin cilmi goonni ah u baahan.

Wmarkii aan arkay qaabkaasi waxaan u fahmay, in uu sixir jiro oo aan sixranahay, hase yeeshee waligeey ma aamminsanayn in deegaannadaasi sixir laga yaqaanno. Markii aan tagay dagmadii aan u socday waxaan tagay masaajidkii ugu weynaa sheekhii dagmada ayaan arrintii u bandhigay, isla markiina intuu i quraansaaray ayuu tusbixiisii igu garaacay, oo yiri shayaadiinta ayaan kaa eryayaa...

Xoogaa waan ku qabowsaday, se markiiba waan bogsooday ma dhihi karin,
Waayoo markasta xusuustaydii waa ay ku jirtay qalbigana waa ka holmanayay, waan hubay oo jaceyl dhab ah ayaan u qaaday gabadhaasna Calaf kumaana lahayn, oo ninkale ayay malaha u calfanayd, jaceylku ma yaqaanno qofka mudan iyo ka munaasabka ku ah, kan aqbali doona iyo kan ku danaysan doona, qofkii uu doono ayuuna ku dagtaa, lagamana daweyn karo, daryeel caafimaadna qofkii la doonay ayaa u ah.

Dagmadii aan dhawaan galka ku ahaa waan ka tagay waxaana safar badda ah u galay magaaladaydii aan jeclaa ee aan badda uga shaqa tagay, waxaa ay ahayd mid aad u bilicsan oo qofka soo jiidata, deegaan ahaanna habboon, waxaa ay ahayd dagmo sanadka oo dhan cimiladeedu dhexdhexaad yihiin, kulayl qabow iyo dabayleedba midna xad-dhaaf kuma noqdo,

mana badnayn dabaysheedu, abaar darteed waligeed loogama qixin.

Waan imid magaaladaydii waxaase igasii war bixiyeen raggii aan isla safarnay qaar ka mid ah oo mar hore magaalada soo gaaray, waxaan si toos ah u tagay gurigii waalidkeey iyo walaalaheey oo aad la iigaga xiisa qabay, runtii kalgacal walaaltinimo oo kala raagay ayaa inoo dhexeeyay waana isku jalboonnay, waxaana la igu canaantay in aan naftayda halis galiyay, khatarna u galay geeri aan khayr lahayn.

Safarkii 2-aad

Waxaan magaaladii joogay muddo bil ah waxaana ka bogsooday, tiicii iyo taag darradii igasoo gaartay safarkii hore ee dhibka badnaa, dammacse waa balaayo e waxaa mar kale ii hillaacday in aan safar kale u baxo, oo aan shaqatago, waxaa macquul ila ahayd inaan

markab gacanta kusoo dhigo, maba fikire waxaan u tagay ninkii markii hore ina maalgaliyay oo haddana diyaar u ah inuu mar kale na maalgaliyo, waxaan ka codsaday in uu igu daro dadka ugu horreeya ee uu qoraayo, si farxad leh ayuuna iiga aqbalay wuxuuna iisheegay in maalmo ka dib ay qolo baxayso oo safar dhaw la aaddi doono, farxad xad dhaaf ah ayaa isoo gashay aniga oo illaawey wixii rafaad iyo qarraaf ahaa ee igasoo gaaray kii hore, waxaan niyadda ku dhisanayay mar haddii aad guuldarraysatay haddana aad markale isku dayday guushu adiga ayay kusoo doonatay.

Doontii aan markii hore waday oo kale ayaan markale gacanta ku dhigay, waan hubaa in bahashaas aan ka adagahay waxkasta oo looga baahdana awood ayaan u leeyahay, runtii Markabkii aan markii hore sigay ayaan rajaynayay inaan soo qabto, waxaan doonayay in aan xirfadda aan badda u leeyahay ka

faa'iideysto, si khaas ah ayaan taliyihii ula hadlay waxaana ku iri niyohow waxaan doonayaa inaad qaadato talooyinka aan kuusoo jeedinayo oo inaga caawindoona in aan markabka qabsanno oo aan madaxfurasho fiican ka qaadanno.

Qodobbadaasi waxaa ka mid ah in ragga aad loogu carbiyo xagga fuulista markabka, in hubka culus ee markab kastaa duleelin kara la badsado, in jaranjarada la adkeeyo oo laga dhiga mid markabka gaari karta waligiisba ha dheeraado e. In la helo nin aad u kala yaqaanna noocyada maraakiibta iyo kuwa dagaalka, markii markabka la fuulana waa in la helaa halka markabka laga wado si kabtanka loo afduubo looguna amro in uu raaco ammarada la siinayo. In la badsado cunnooyinka aan hallaabayn sida malabka iyo timirta.

Warkaygu waxa uu ahaa lama taabtaan oo waxaa loo arkayay farriin waaya arag, isla kolkiina, Ninkii taliyaha ahaa fariintaydii waxaa uu u geeyay ninkii isaga ahaa ee maalgaliyaha ahaa, dalabkiina waa la wada fuliyay, waa arrin wanaagsane inaga oo faraxsan aadna ugu rajo weyn in aan guulaysanayno ayaan kasoo baxnay magaaladii, waxaana soo aadnay xeebtii aan kalkii hore ka shaqa tagay oo ahayd mid ku caan baxday shaqatagga, dadkuna haddii ay uga jeedaan doomo yar yar waxay xaqiiqsan jireen in ay qolo shaqatagayso.

Goor duhur ah ayaan magaaladii ka baxnay waxaana aadnay Shidaalkii, raashinkii iyo hubkii ayaan foolfaha saaranay waxaana isku diyaarinay in habeenkii aan badda galno oo wixii uu ilaahay nagu bixiyaba aan badda dhex mushaaxno, raggu waa ay ka hal adayg badnaayeen kuwii hore oo raggani waxay ahaayeen kuwo lasoo xulay oo warkooduba

yahay dab iyo holac haddii ay inaga horyimaadiina xitaa waa in aan gubnaa oo aan dhiigga ag dhignaa.

Goor toddobo saac oo habeennimo ah ayaan dhaqaaqnay oo badda galnay inaga oo wadanna qalab dhammaystiran, Rag dhaarsan iyo hub laba dhacaya, nin waliba waxaa uu qorshihiisu ahaa ama aan dhinto ama aan gacanta kusoo dhigo, qofkastaa waxaa uu ahaa mid seeftiisa ay gasha ka baxsan tahay, diyaarna u ah in uu dagaallamo inta ay dhibac dhiig ah ku jirto, naftana u huro sidii uu markab kusoo qabsan lahaa, oo uu magaaladaas xeebteeda ugusoo xiri lahaa.

Labadeenna doomood ee yar yaraa waxaa ay inoogu daba xirnaayeen foolfaha, raggana waxa qorshahooda ahaa inay markab soo qabtaan ama xaraabiga dagaalka uu eber ka dhigo, qadkii maraakiibta ayaa la galay waxaan soconnaba,

nasiib wanaag maalin afarsaac ah ayaan aragnay markab aad u weyn oo si tartiib ah iskaga dhex mushaaxaya badda, qalabkeennii ayaan diyaarsannay oo doomihii yar yaraa ku gurnay, dag dag ayaana uga hoos dhalanay isaga oo aan na dareensanayn, labada dhinac ayaan ka raacnay markabkii rasaastana roobka ayaa looga dhigay, looma naxariisane baasuuke qoray loo yaqaano oo halmar la cabbeeyo se markaas khasaaro weyn gaysta ayaa lagu hurgufay.

Run ahaantii waan hilbaysannay markabkaan aan wax xabbad ah inagusoo ridayn xawaarihiisana uu aadka u yaryahay, balse dhibku waxaa uu ka yimid in jaranjaradii ay inoo gaari weysay, yacnii markabka ayaa aad u dheeraa jaranjartuna waa ay gaabnayd, wax aan sammayno ayaan garan weynay se rasaasta ayaan roobka uga dhignay annaga oo naawilayna in uu jaranjaro soo dajiyo, fursadse looma siin oo ninkasta oo soo dajin lahaa

jaranjaro waxaa uu ka baqaayay in ay xabbaddu leefto.

Xabbaddii annaga oo sidii ugu hurgufayna ayuu mar qura taliyihii yiri " Joojiya xabadaha ha iiga dhammaynina e, mid kale ayaa hareerteenna kasoo baxaye, haddii aan fiirinay waaba dhab oo inyar meel inoo jirta ayuu mid aad u raran oo biyahay ku jira (culaysdartii badda inbadan oo markabka ka mid ah ay hoos u gashay) ayaa horteenna isku dayaya inuu cararo, waan ka daba qaadannay oo waan weerarnay, khasaaraduse waxaa ay ahayd in markabku uu ahaa mid dagaal oo is magoogaya markab xammuulna isku ekaynaya, laba xabadadood markii lagu riday ayuu roobka inooga dhigay Rasaas aad mooddo in middiiba ay le'egtahay laba kuweenna ah oo la isku daray.

Dhawr xabbadood ayaa igu dhacday se uma joojin oo dhaawac jiirmaryo ah ayuu ahaa

dhaawacaygu waxaanse doontii sii wadi waayay markii ay gacanta xabbad iiga dhufteen, matoorkii gacankii laga wadi lahaana ay jareen, wax aan sammeeyno ayaan garan waynay, balse difaac ayaan ku aruurnay oo in ay inoo yimaaddiin waan diidnay, awooddeenna ayaase iska yarayd oo dhawr diyaaradood iyo doommo dheereeya ayaa inalaku soo kiciyay, cabsi ba'an ayaana ina gashay markaa, waxaana caddaatay in aan gacangalnay.

Doomihii mid ka mid ah ayaa nagusoo ag xiratay iyada oo afsoomaali inagu leh waar ha is dilina adinka oo hubka iska dhiga, haddii aad ammarkaas u hoggaansan taan waad badbaadeysaane, sidii ayaana yeelnay oo hubkii ayaan dhulka dhignay, si tartiib ah ayayna inagu maamuleen, labadeennii doomood iyo intii hub iyo alaab qaali ah saarnaydba annaga oo arkayna ayay diyaarad gubtay, oo intay

qumbulad holcaysa ku tuurtay wixiiba isla holceen.

Doomahoodii ayay nagu qaadeen waxaa ayna inoo geeyeen markabkii dagaalka, qolyay inagu xareeyeen sidii riyo kor u baxays ah oo la xaraynayo cunno iyo cabitaan ayay inoo keeneen waana cunnay, waxa ay inoosoo direen nin soomaali ku hadlaya oo caddaan ah, waraysi ayuu nala yeeshay markastaana waxaa uu ina waydiinayay waxa aan nahay annagana waxaa aan ku lahayn waxaanu nahay qoladaas aad u jeedid ee inagadaa waraysigaan baase saaxiibbadaa u sheeg in ay inasii daayaan maaddaama aanu iskusoo dhiibnay iyaga.

Daqiiqado markii aan isla murmaynay ayuu inaga tagay, markabkii xawaarihiisana la kordhiyay, runtii dhanaca uu markabku aaday garan mayno se waxaa muuqatay in uu aad u dhaqaayay, oo xawaaro xadka ka baxsan uu ku

socday, qolkeennii ayaana iskaga jirnay oo xitaa cidi nooma ogolayn inaan istaagno afarnin oo hubka diiradda leh wata ayaa afarta dhinac innaga taagnaa, cabitaan aad u macaan, buskud iyo waxyaabo kale oo hilib ku darsanaa ayaa agteenna yaallay, oo qofkii cunno u baahdaa waa uu cabbi karay cunidna waa sidaas oo kale, balse wixii hilib ku shaqo lahaaba ma cunin annaga oo dhahayna doofaar iyo waxdaran in ay ku jiraan ayaa laga yaabaa ee inaga daaya

Markabkii sidii uu u socday ayuu mar qura istaagay oo aan dareenay in la istaajiyay, waxaa aan is weydiinnay miyaa la joojiyay markabka ? Nin ragga ka mid ahaa oo dhawr mar la xiray ayaa yiri meeshii ay noo wadeen ayaa laga diiday oo meel kale ayaa loo tilmaamay ee innoo duceeya in llaaheey meel khayr leh nagu jiheeyo, waan ducaysannay sidii rag fiican. Waxyar ka dib ayaan dareennay kala wareegga markabka iyo shaallidda uu markabku

hooseeyda ka shaalayo maaddaama uu jihadii badalay, waxaan iri ma jiha baddalbaa mase waa anigaa mooda waa la igu raacay in jihadii la badalay.

Daqiiqqdba kama soo wareegine ninkii ayaa inoosoo laabtay oo inagu yiri nasiib ayaad leedihiin waxaa la doonayay in shiishalis la idinku xiro se waa ay diiday haddana jabuuti yaa la idiin wadaa ee waxba yaal la idinka dareemin markaa ayaan ku niri adiga ma soomaalibaad tahay, waxaa uu yiri haa soomaali baan ahay waliba qabiil hebel ah.

Waxaan ku niri sidee qoladaan iskula falgasheen, wuxuu yiri iyagoo qoranaya ciidama soomaali ahbaan ku biiray maaddaama aan shan luqadood si wanaagsan u aqaano, sidaas ayaan ula shaqaynayay haddana taladaa in jabbuuti la idin geeyo ah aniga ayaa soo jeediyay, waana ku taamayaa runtii in aan inbadan oo dhallinyaro

soomaaliyeed ah xabsi daa'in ka badbaadi haba qaldanaadaane. Waan u mahadcelinnay annaga oo wajiga xumaynayna si kuwa inala jooga aanay cilmi nafsi ahaan u fasiran waxa meesha ka dhacaya.

wax aan soconnaba waxaa aan tagnay dakaddii jabbuuti waana waa nala dajiyay waxaana naloo dhiibay ciidanka ilaalada xeebaha ee jabbuuti iyagiina waxaa ay ina geeyeen xabsi ku yaallay magaalada jabbuuti, farxad ayay ii ahayd markii la igu xiray xabsigaas waayo waxaa uu ahaa mid ay suurta gal ii ahayd inaan ka baxo muddo dhaw, maaddaama fursado badan oo aan uga baxsado aan haystay.

Afarbilood ka sib ayuu Alle Sw ii qadaray in aan xabsigaa kasoo baxo oo aan dib ugusoo laabto magaaladeydii aan jeclaa. Qaraabadii ehelladii iyo Dadkii i yaqaannay oo iga quustay markii ay maqalkayga waayeen ayaan mar qura muuqaalkayga farax uga dhigay, halka qaar

badan oo ka mid ah ay sidii maskii iskugukay duubeen oo iga fuqi waayeen in muddo ah, hiloow iyo xiiso ay ii qabeen darteed.

Safarkii 3-aad

Laba bil markii aan joogay ayaan mar saddexaad go'aansaday in aan safar u baxo oo aan markaan ugu dambayn ka dhigo haddii aan ku guulaysto iyo haddii aan ku guuldarrastaba maalgaliye kale oo aan kii hore ahayn ayaan u tagay kaddib markii uu kii hore iiga cudur daartay in uu laba mar soo bayl qaaday markalena aanu awoodi in uu si deg deg ah koox kale u diro, kii kale ee aan u tahay aniga ayuuba taliye iiga dhigay kooxdii uu safarka u diraayay taasi aniga waa ay i cajab galisay maaddaama aan ahaa nin waxbadan ka bartay safarradaas oo kale.
Si deg deg ah ayaan iskugu dubba riday raggii ila shaqa tagi lahaa iyo qalabkiiba.

Muddo saddex maalmood ah ayayna igu qaadatay in aan xeebta geeyo shaqatagayaal diyaarsan oo toos u aadi kara badda, goor galab ah ayaan marsadii ku diyaariyay, shaqo tagayaashii oo diyaarsan, habeenkii afarsaac oo habeennimona waan socdaalnay. Habeenkaas habeen ba'ay ayaan uga dhignay, maalintaasna si la mid ah habeenkii xigay waan soconnay, maalintii xigtay socod, habeenkii dambe ayaan dhaqaaqalyo markab galnay, safarkaan iyo safarkii hore isku mid ma aha, safarkaan waxaan kusoo daray qalab markabta lagasoo dajiyay oo suurta galinaya in doomaha ay wada xiriiri karaan, inta kilometer ee ay isku jiraanna sheegaya, jahada ay iskugu aaddan yihiin iyo in ay sii kala fogaanayaan iyo in ay iskusoo dhawaanayaan lagu ogaankaro.

Qalabkaasi waxaa mid lagu xiray foolfaha mid waxaa lagu xiray doonta koowaad mid waxaa

lagu xiray doonta labaad, markaan doonno ayaan isku immaankarnay, suurta galna ma ahayn in aan kala lunno ammar Alle sw moojaane. Markabkii ugu horreeyay ayaan weerarnay, waxaana ka galnay labada dhinac inaga oo hubkii ku hurgufayna oo aan xitaa mar ka joojinayn, daqiiqad kadib ayuu istaagay isaga oo muujinaya in ay halis ka dhalan karto haddii markabkaan la xabbadeeyo.

Raggii ila socday ayaan ka waayay mid markabka jaran jarada saari kara oo intuu doonta ku dhex istaago culayska jaranjarada iyo qorayga isla qaadi kara, cilladda kale oo jirtay waxaa ay ahayd waxaan wadannay hal jaranjaro oo doonta labaad wax jaranjaro ah ma saarnayn, middaan kaliya ayaa lagu fuuli rabay haddii la qabto markabka.

Doontii kale ayaan la xiriirtay waxaana weydiiyay in ay isoo gaari karaan iyo inkale, waxayse ii sheegeen in matoorkii cilladoobay oo

iyaguba ay halis ku jiraan, markabkii matoorkii gacankiisii ayaan mid kale u dhiibay oo aan ku iri sidaan u celcelin si aanu markabka uga dhaqaaqin doontu yacnii kusoo Raawis, se waxa laga hadlayaba ma fahmine oo badba waxba kama aqoone doontii ayaa la daadday, oo waa xakamayn waayay.

Nasiib wanaag markabkii jaranjaradii waan saaray, waana ku tigaystay, aniga iyo saddex kale oo doonta saarneedba waan fuulnay waan is qaybinnay labo kabtankii ayay aadeen labana dadkii kuruuga ahaa ee markabka saarnaa ayay aruuriyeen oo qolalku xireen, kii aan doonta ugasoo tagnay war lagama haayo oo wax helayba lama yaqaanno isaga iyo doontiisii ayaa iskugu kaaya dambaysay, markii aan markabka gawgiisa imidna gadaal ma fiirinba.

Kuwii kale ayaan qadka kala hadlay mase maba jiraanba wax ila hadlaya oo waala aammusan

yahay, daqiiqad ka dib ayay qolo aanan afkooda fahmin ila hadleen waxaana garawsaday in kuwaasi la qabtay, mar haddii kuwaas la qabtayna waa hubaal in ninkii aan bannaanka ugasoo tagnay isaga la qabtay. Waxaana isku diyaarinay sidii markabkaas aan xeebta ku gayn lahayn, afarninbaan nahay dadka markabkana waa inaga badan yihiin, se waxaan qorshaysannay in aan qaar ka mid ah cabsiinno ama sagxadda markabka aan xabado ugu dhufanno.

Kabtankii ayaan u tagnay markabkiina waan af duubnay dhibka ina haystayse waxaa uu ahaa in qof af yaqaan ah aanu inala socon oo, aan garan weynay wax aan kula hadalno kabtanka, isagiina wax lagula hadlayo aanu fahmayn, nasiib wanaag si aan yeelnayba khariidad hortiisa taallay ayaan soomaaliya uga tilmaannay markaa ayuu inasoo hordhigay marsooyin u calaamadaysnaa oo digniin gaduudan u

saarnayd. Middii aan rabnay ayaan markabkii ku jahaynay maraakiibta dagaalka ayaa inagusoo hareeraysantay iga oo aad moodayso ari oodda laga sii qaaday.

Waxaas looma jixin jixin oo markabkii dagaalka oo horteenna taagan ayaa kabtankii la yiri "ku dhufo haddii uu kaa wareegi waayo, haddii aad diiddana annagana ayaa kugu dhufanayna xabbadda warkaas ma uu fahmin se indhaheenna ayuu ka akhristay in meesha wax naxariis ah aanay aallin, qaabka aannahay ayaaba laga naxayaa ka sakoow hubkaan aan la jaraynayno.

Waxaa aan la xiriirnay maalgaliyihii inasoo diray waxaana u sheegnay in aan gurmad u baahannahay isagiina waxaa uu inoo sheegay in markab kale oo marsada ugu xiran uu ciidan horleh soo saari doono, sidii ayaana la yeelay annagiina kii ayaan sii wadnay oo aan

gaarsiinnay meel u dhaw biyaha Soomaaliya, markabkii kale ee isaga u afduubnaa ayaa soo baxay iska markaana xaggeenna soo aaday, isma weynayno oo waa qaab la iskugu talagalaye wuu inoosoo dhawaaday hase yeeshee kuwii dagaalka ayaa isku hor gooyay, waa ammin habeen ah mugdi ah. Kuwii gurmad ka inoo waday waxaa isku hor jaray markab dagaal oo doonayay in uu ina dhexgalo oo wax gurmad ah aanu noo imaan.

Waxaase markabka saarnaa rag balaayo ah oo wixii uu markabka dagaalka sameeyaba kabtanka ku amraya inuu sameeyo tusaale mar uu nal weyn soo shiday, iyagana waxaa ay ku shideen mid kasii weyn oo uu lahaa markabkaan iyaga u afduuban, haddii uu markab isku horgooyo waxaa ay dhahaayeen soco dardar markabkaan dagaalka, haddii aadan dardari karina kala dooro xabadda mariinayska iyo middeenna tan macaan.

Waa inoo yimid markabkii isaga oo ciidankii wada, sidii militarigii ayayna markabkii ugu soo dhexdaateen se maraakiibtii dagaalka ayaa inagusoo dhawaaday, afka ingiriiska ayaa lagula hadlay waxaana loo sheegay in ay inaga fogaadaan, haddii ay fogaan waayaanna waxaa loo sheegay in Rasaastu ay dhiig arki doonto.

Wixii aan soo jiitanno oo aan maraakiibta isku hor wadnaba waxaan nimid marsadii aan markii hore ka baxnay annaga oo markab wadanna lacag culusna filanayna, sidii ayaana loogu xiray markabkii marasdii magaaladii aan jeclaa, qofkastaa oo inaga mid ahna lacag jeeb baarasho la yiraahdo oo farabadan ayuu markabka kala dagay, magaaladiina ku galay, magaaladii oo aan u xiiso qabay ayaan dhexdamaashaasay aniga oo lacag haysta, dadkuna ii sacabba tumayaan.

Waxaan sii dayn qaatay gaari qaali ahaa oo markaa aad loo xiisaynayay, guryo badanna waan dhistay aniga oo aan wali markabka lacag ka qaadan, lacag kasta oo aan qaato wax dheef koror la yiraahdo ayaa korsaarnaa oo boqolkii aan qaato laba boqol ayaa la iga doonayay, lacagta si xadka ka baxsan ayaan ugu dheeli jitay oo waxaa aan xasuustaa in gaari afartan kun oo doollar la iga siiyay intuu ila gadoomay aan iri xitaa meeshiisa ka qaadi maayo ee gaari kale ha la iikeeno. Ee isla goortii uu ila gaddoomay la ii keenay.

Hadda Alle mahaddii wixii oo idil waan ka baxay kalluumayste sharfan ayaana ahay guryihii aan ka dhistayna mid waan iibiyay midna hadda ayuu iib iiyahay midna isaga oo qabyo ah ayay lacagtii iiga dhammaatay, waxaana daganahay guri aan kalluumaysigaan ka dhistay oo magaaladaan ku yaalla. Alle mahaddiise adduunkaan iska cayrsadaa... saddax carruur ah

oo iijoogta iyo hooyadood ayaana u xamaashaa. Allaa mahadlehe waa ay inagu filnaadaan wixii aan ka helno kalluumaysigaan aad arkayso.

Qadhooyo

Sidaas ayuu sheekadii uu ii waday kusoo gabagabeeyay isaga oo dhoolla cadaynaya maalintaasna aan u diiday in uu seexdo maaddaama uu billow iyo dhammaad uu iiga sheekeeyay qisadiisa waxaa kale oo uu iisheegay in ay jiraan rag saga ka daran oo xitaa qaar ka mid ah ay maryahoodii cuneen akhristow ma jeclaan lahayd in aan nimankaas raadiyo oo aan iyagana sidaan oo kale usoo waraysto ?